

فَتاوَى الصِّيَامُ

FATAAWADA SOONKA

Sh. CabdulCasiis bin Baaz

iyo

Sh. Muxammad Al-
Cusaymiin

Waxa Tarjumay:
Maxamed Sh.Cabdiraxmaan
Kaariye

غفر الله له ولوالديه ولجميع المسلمين

WWW.ALYAQIIN.COM

بسم الله الرحمن الرحيم



إِنَّ الْحَمْدَ لِلَّهِ نَحْمَدُهُ، وَنَسْتَعِينُهُ وَنَسْتَغْفِرُهُ، وَنَعُوذُ بِاللَّهِ مِنْ شَرِّ أَنفُسِنَا، وَسَيِّئَاتِ أَعْمَالِنَا، مَنْ يَهْدِي اللَّهُ فَلَا
مَضْلَلٌ لَّهُ وَمَنْ يَضْلِلُ فَلَا هَادِيٌ لَّهُ، وَأَشْهَدُ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ وَحْدَهُ لَا شَرِيكَ لَهُ، وَأَشْهَدُ أَنَّ مُحَمَّداً عَبْدُهُ
وَرَسُولُهُ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَآلِهِ وَصَحْبِهِ وَسَلَّمَ تَسْلِيمًا كَثِيرًا.

أَمَّا بَعْدُ، فَإِنَّ أَصْدِقَ الْحَدِيثِ كِتَابُ اللَّهِ تَعَالَى، وَأَحْسَنُ الْهَدِيَّ هَدِيُّ مُحَمَّدٍ -صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَآلِهِ وَصَحْبِهِ
وَسَلَّمَ- وَشَرُّ الْأُمُورِ مَحَدُثَاتُهَا، كُلُّ مَحَدُثَةٍ بَدْعَةٌ، وَكُلُّ بَدْعَةٍ ضَلَالٌ.

Shaki kuma jiro fadliga uu leeyahay cilmiga sharcigu, waayo isaga ayaa ah dhaxalkii Nabiga (صلى الله عليه وسلم), la'aantiina cibaadada iyo camalku toosnaan maayaan. Sidaas darteed waa in qofka caqliga leh ee doonaya nabadgelyada aduunka iyo aakhiraba uu ku dadaalaa cilmiga sharciga, kana ag dhawaadaa mar walba culimada rabaaniyiinta ah ee ku caan baxday cilmiga ku qotoma kitaabka iyo sunnaha, kuna tilmaaman camalka iyo cibaadada toosan ee bidcada ka fog, islamarkaana ku dadaala waraca iyo taqwada Alle (سبحانه وتعالى). Kuwaasayna yihiiin kuwa qofkii ka ag dhawaadaa ka badbaadayo shaqinimo iyo baadi Ilaahay idankii.

Buugan gaaban oo ka kooban afartan iyo sagaashan (94) fatwo waxaan ku soo ururiyay fatwooyin la xidhiidha axkaamta soonka, kuwaasi oo ay ka jawaabeen Sheekh Cabdul Casiis bin Baaz iyo Sheekh Muxammad bin Saalix al-Cusaymiin (رحمهما الله). Labada Sheekh oo run ahaantii ka mida Culimada dunida Islaamka soo martay casrigan kuwa ugu waaweynaa, waxay ku sifoobeen cilmi xeel dheer oo ka anba qaadaya Kitaabka iyo Sunnaha, waxay ka badbaadeen tacasubka indhaha la' ee qofka ka horistaaga inuu xaqa aqbalo kuna dhaqmo. Wuxuu intaa u dheeraa warac iyo taxadir badan oo ay kaga nabad galeen inay fatwadoodu noqoto hawo raac iyo xaq ka caymad. Ilaahay hanagu anfaco cilmigooda.

Anaguna waanu jecelnahay culimadayada kuwii salafka iyo kuwa wadadoodii haya ee maanta iyo casriganba nool, jacaylkooduna waa mid diin noo ah oonu Ilaahay (سبحانه وتعالى) ugu dhawaanayno.

Waxaan leeyahay siduu imaam Ad-Daxaawi ku yidhi caqiidadiisa caanka ah:

(وَعِلْمَاءُ الْسَّلْفِ مِنَ السَّابِقِينَ وَمِنْ بَعْدِهِمْ مِنَ التَّابِعِينَ ، أَهْلُ الْخَيْرِ وَالْأَثْرِ ، وَأَهْلُ الْفَقْهِ وَالنَّظَرِ ، لَا يُذْكَرُونَ إِلَّا بِالْجَمِيلِ ، وَمِنْ ذِكْرِهِمْ بِسُوءٍ فَهُوَ عَلَى غَيْرِ سَبِيلٍ)

(Culimadii hore ee salafka, iyo kuwii taabiciyiinta ee ka dambeeyay waa ehlukhayr iyo ehluxadiisa, waana ehlufiqi arag leh, lagama sheegi karo waxaan wanaag ahayn. Qofkii xumaan ka sheegaana wuxuu ka leexday jidkii culimada iyo ehludiinka).

Culimada ku hanuunsan jidka Qur'aanka iyo sunaha, ee kulansatay cilmiga iyo camalku waa sida xidigaha la iftiinsado mugdiyada habeenka gurcudka ah.

Waxaan hindisayaa oon ku fakirayaa (إِنْشَاءُ اللَّهِ) inaan buugan balaadhiyo oon ku kordhiyo fatwooyin kale oo labada sheekh kaga jawaabeen axkaanta soonka, isla markaa waxaan ku xigsiin doonaa (إِنْشَاءُ اللَّهِ) fatwooyin ay labada sheekh kaga jawaabeen su'aalo laga wediiyay axkaanta xajka. Ilaahey (سَبَّحَنَهُ وَتَعَالَى) ayaan ka baryayaa inuu noo barakeeyo waqtigeena, nagana aqbalo camalkeena.

Waxa kale oon Ilaahey (سَبَّحَنَهُ وَتَعَالَى) ka baryayaa inuu fatwooyinkan ku anfaco cidii akhrisata, labada sheekhna ka abaal mariyo. Anigana iiga dhigo tarjumadan camal saalixa oon maalinta qiyaamaha ka helo miisaanka xasanaatkayga, Isaga ugu deeq badan cid wax la weydiisto oo la baryo, uguna kariimsan cid la rajeyyo.

Alle ayaa towfiiqda bixiya, Isagaan talo saartay, Isagaan raxmadiisa rajaynayaa, Isagaanan ka baryayaa inuu aniga, waalidiintayda , cidaan jecelayah ee axbaabtayda ah iyo Muslimiintaba ku manaysto dambi dhaaf iyo jantul firdowsa.

FATAAWADA SOONKA

Waxaan Ilaabteen inaan u mahad noqo walaalkay iyo saaxiibkay Sh.Cabdul Khaaliq Jaamac Ismaaciil, oo ka qayb qaataay soo saarka buuggan, Alle ajarkiisa ha siiyo.

Ilaahay (سبحانه وتعالى) ayaan ka baryayaa inuu nagu arsaaqo sidqi iyo ikhlaas, cilmi naafica iyo camal saalixa.

Maxamad bin Sh.Cabdiraxmaan kaariye

2/Ramadaan/1429

Portland, Oregon

Qof Isagoon Waxba Cunin ama Cabin Niyaystay Inuu Soonka Jabiyo

1. Su'aal: Hadii qof si kama dambaysa u niyaysto inuu soonka jabiyo isagoon wax cunin ama cabin, miyuu soonkiisu jabaya?

Jawaab: Wuxuu niyaystaa inuu soonkiisa Alle ugu dhawaado isagoo ka tagaya waxyaabaha soonka jabiya, hadduuse

go'aansado inuu fical ahaan u jabiay soonkiisii, kolkaasi soonkiisu wuu jabay. Hadduu soon Ramadaan yahayna waxa ku waajiba inuu ka fogaado waxyaabaha soonka jabiya ilaa cadceed dhaca, waayo qof walba oo cudurdaar la'aan ku afuray maalin Ramadaan waxa ku waajiba inuu inta maalinta ka hadhay ka fogaado waxyaabaha soonka jabiya iyo inuu maalintaa qalleeyo.

Qofkiise aan go'aansan (inuu soonka jabiyo) ee wali isku haya inuu jabiyo iyo in kale, kaasi arinkiisa culimadu way isku khilaafeen:

Waxa ka mida kuwo yidhi: Soonkiisu wuu buraya, waayo go'aan li'ido waxay lid ku tahay go'aanka.

Kuwo kale ayaa yidhi: Soonkiisu ma burayo. Waayo waxa asala oo la tix gelinayaa inay niyadu jirto ilaa uu go'aansado inuu gooyo oo uu suuliyo. Kan (ra'yigan) ayaan rajaxayaa xoog ahaantiisa awgeed, Ilaahey ayaan u cilmi leh.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Qof Wali Wax cunaya iyadoo loo Adimayo Subixii

2.Su'aal: Akhristaha C.Al-Faarid ayaa doonaya inuu ogaado xukunka shareecada ee ku saabsan soonka qof isagoo maqlaya adaankii subaxa hadana wax iska cunaya oo cabaya?

Jawaab: Qofka mu'minka ah waxa ku waajiba inuu ka joogsado waxyaabaha soonka jabiya sida cunada, cabitaanka iwm haddii ay u cadaato inuu waagii baryay, soonkuna yahay farad sida Ramadaan, soonka nadarka iyo soonka kafaaro gudka. Waayo Allaah ayaa yidhi:

{وَكُلُوا وَاشْرِبُوا حَتَّىٰ يَتَبَّعَ لَكُمُ الْخَيْطُ الْأَبْيَضُ مِنْ الْفَجْرِ ثُمَّ إِنْتَمْ بِالصِّيَامِ إِلَى الْلَّيلِ} البقرة: 187.

{Cuna oo caba ilaa ay idiin kala cadaadaan khadka cad (waaga) iyo khadka madow (habeenka) ee waqtiga fajarku, soonkana dhamaystira ilaa habeenka}

Haddii uu qofku maqlo adaanka, ogaadana in loo adimayo fajarkii waxa waajib ku ah inuu ka joogsado waxyaabaha soonka jabiya, haddiise uu mu'adinku adimayo waabariga ka hor ama ka dib kolkaasi waxay badbaadadu (الأحوط) ku jirtaa inuu iska joojiyo waxa soonka jabiya markuu maqlo adaanka. Dhibna gaadhimayso haddii uu wax cuno ama cabو xillaga adinka, waayo wali kama warqabo inuu waagii baryay.

Waxa la ogyahay in qofka ku dhix nool magaaloooyinka laydhadhka lihi aanu xilliga waago baryayo awoodin inuu garto in waagii si dhaba u baryay iyo in kale. Waxase la gudboon inuu dadaalo isagoo kaashanaya adaanka iyo jadwalada kuu sheegaya saacadda iyo daqiiqada uu waagu baryayo, isagoo ku camalfalaya hadalka Nabiga (صلى الله عليه وسلم) ee ah:

((دع ما يربك إلى ما يربك))

(*Ka tag wixii ku shaki galiya oo ku camal fal wixii aan ku shaki galin*)

Iyo hadalkiisa (صلى الله عليه وسلم) ah:

((من اتقى الشبهات فقد استبراً لدینه وعرضه))

((Qofkii ka dhowrsada arimaha shakigu ku jiro waxa uu badbaadiyay diintiisa iyo sharafkiisa)).

Allaana bixiya towfiiqda.

Sh.Ibnu Baaz

Qof Wax Cunay Iyadoo la Adimayo ama Wax yar Adaanka ka Bacdi

3. Su'aal: Alle tacaalaa waxa uu yidhi:

{وَكُلُوا وَاشْرِبُوا حَتَّى يَتَبَيَّنَ لَكُمُ الْخَيْطُ الْأَبْيَضُ مِنَ الْخَيْطِ الْأَسْوَدِ مِنَ الْفَجْرِ ثُمَّ أَتَمُوا الصِّيَامَ إِلَى اللَّيلِ} البقرة: 187.

{Cuna oo caba ilaa ay idiin kala cadaadaan khadka cad (waaga) iyo khadka madow (habeenka) ee waqtiga fajarku, soonkana dhamaystira ilaa habeenka}.

Waa maxay xukunka qofka suxuurtiisa iska dhamaysta biyana caba xiliga adaanka ama rubuc saac ka dib adaanka?

Jawaab: Haddii qofka su'aashan ku xusani ogyahay in xilliga uu wax cunay waxna cabay ka horeeyay waabariga, qale isaga kuma waajibin. Haddiise uu ogaado inuu wax cunay waxna cabay waabariga ka dib, kolkaasi qale ayaa ku waajiba. Haddiise uu kala garanwaayo in xilliga uu wax cunay ee cabay ahaa waabariga ka hor ama kadib kolkaasi qale kuma waajibin, waayo waxa la xukumaya in ay habeen tahay illaa ay cadaato inuu waagii baryay. Waxase qofka mu'minka ah u haboon inuu soonkiisa ilaashado, oo markuu adaanka maqlo ka istaago waxyaabaha soonka buriya, ilaa uu ogyahay mooyee in mu'adinku adimayo waqtigii subaxa ka hor.

Sh.Ibnu Baaz

Soonka Isku xidhiidhsan (Wisaalka)

4. Su'aal: Waa maxay soonka wisaalku (laysku dabaqabto), miyuuse yahay sunne?

Jawaab: Soonka wisaalku waa inuu qofku soonka isku daba qabto laba maal mood oo isku xiga isagoon afurin, Nabiguna (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) wuu nahiyay soonka sidana wuxuuna (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) yidhi:

((من أراد أن يواصل فليواصل إلى السحر)).

((Qofkii doonaya inuu soonka isku daboqabtaa ha sameeyo ilaa suxuurga)).

Soonka oo laysku daba qabto ilaa waqtiga suxuurtuna waa banaanyahay, hasayeeshee sida sunnaha waafaqsan ee Rasuulkuna (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) inagu dhiiriay waa in afurka la dadajiyo wuxuu (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) yidhi:

((لا يزال الناس بخير ما عجلوا الفطر)).

((Dadku khayr ayey ku sugnaan inta ay afurka dedejiyaan)).

Waxase uu u banneeyay inay soonku isku dabaqaban karaan markay ku yidhaahdeen Rasuulkii Ilaaahayow (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) adiguba waad isku daba qabataa soonka, wuxuu ku yidhi:

(إنِّي لَسْتُ كَهِيئَتَكُمْ)

((Anigu sidiina ma ihi)).

Sh. Ibnu Cusaymiin

Matagu Miyuu Soonka Jabiya?

5. Su'aal: Matagu miyuu jabiya soonka?

Jawaab: Haddii qofka soomani dhaawacmo, gororo (sanka dhiig ka yimaado), matago, biyo ama batrool ku siibtaan dhuuntiisa (cunaha) isagoon u qasdiyin,

arimahaas oo dhami ma jabinayaan soonka, hayeeshee qofkii ukas iskaga matajiya soonkiisu wuu buray siduu Nabigu (صَلَى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) yidhi:

((من ذرعه القبيء فلا قضاء عليه ومن استقاء فعليه القضاء)).

((Qofkii matagu soo jiidho qale laguma laha kiise iska matajiya waxa ku waajiba qale)).

Sh.Ibnu Baaz

Indhokuushu Soonka Ma Jabiso

6. Su'aal: Waa maxay xukunka qofka sooman ee indho-kuusha?

Jawaab: Waxba kuma jabna inuu qofka soomani indho kuusho iyo inuu indhihiisa ku dhibciyo dawo midna, sidoo kale waxba kuma jabna inuu dhagahiisa dawo ku dhibciyo xitaa hadii uu dhadhankeeda ka dareemo dhuuntiisa soonkiisu ma jabayo. Waayo cunto iyo cabid midna maaha, lamana mid aha cabid iyo cunno (raashin la quuto), Daliilkana waxa lagu caddeeyay in la manciyay cunada iyo cabida, kolkaasi waa in xukunkaasi aan lagu darin wixii aan cunada iyo cabidda la mid ahayn. Sidaasi aanu sheegnayna waxa qaba Sheekhul Islaam ibnu Taymiye Allaah ha u naxariistee, sidaasi ayaana saxa. Haddiise uu qofku sankiisa dawo ku dhibciyo dabeetana ay gudihiisa gasho isaga sidaasi soonkiisu wuu ku jabaya, waa hadduu u qasdiyay, sida ku sugar qowlka Nabiga (صَلَى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ):

((وَالْمُؤْمِنُ أَكْبَرٌ))

((Sandaarsiga ku xeel dheerow, adigoo sooman mooyee)).

Sh. Ibnu Cusaymiin

Biyo Ayaa Ku Siibtay Isagoon u Qasdiyin

7.Su'aal: Nin sooman ayaa isagoo maydhanaya ayaa isagoon u qasdiyin ay biyihii galeen gudihiisa (إلى جوفه) xooga biyuhu ku socdaan awgii , ma qalle ayaa ku waajiba isaga?

Jawaab: Qalle waajib kuma aha, waayo umuu kasin, xukunkiisuna wuxuu la mid yahay qofka la qasbay iyo qofka illowsan (hilmaamsan) (المكره والناسي).

Sh.Ibnu Baaz

Luqluqashada Qofka Sooman

8. Su'aal: Hadduu luqluqdo qofka soomani ama sandaarsado oo biyuhu galaan gudihiisa miyuu soonkii ka jabayaay?

Jawaab: Hadduu luqluqdo qofka soomani ama sandaarsado oo biyuhu galaan gudihiisa soonku kama jabayo, waayo umuu kasin, Allena koreeyee wuxuu yidhi:

وَلَيْسَ عَلَيْكُمْ جُنَاحٌ فِيمَا أَخْطَأْتُمْ بِهِ وَلَكُنْ مَا تَعْمَدُتْ قُلُوبُكُمُ الْأَحْزَابُ

{Dambi idinkama saarna waxaad ku gaftaan, laakiinse (waxa laydin weydiin) wixii ay u kasto quluubtiinu}.

Irbadaha Dawooyinka ah Iyo Soonka:

9. Su'aal: Irbadaha dawada ah ee laysku mudu (turqo) marka la soomanyahay miyay raad ku leeyihiisoonka?

Jawaab: Irbadaha laysku daweyaa waxa ay u kala qaybsamaan laba nooc oo midkood yahay kuwo loola jeedo raashin (cunno) ahaan lagagana maarmo cunnada iyo cabitaanka, hadaba hadday la mid noqdeen cunadii iyo cabistii way jabinayaan soonka, waayo wixii nusuusta sharciga (xadiiska ama Qur'aanka) xukunkiisu ku sugmay hadii la helo wax kale oo la macno ah (la mida) waxa ku dabaqmaya isagana xukunkaas laftiisa. Nooca labaadna waa irbadaha aan la quudsan een lagaga maarmi karayn cunnada iyo cabitaanka, kuwani ma jabiyaan soonka waayo xukunka nasku sinaba uguma dabaqmayo, waayo cuno iyo cabitaan midna maaha, islamrkaana maaha wax sidii cunno iyo cabitaan la mida. Wuxaana asala in soonku sax yahay ilaa la helo wax daliilka sharciga waafaqsan oo uu ku jabo.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Soonka Caruurta

10. Su'aal: Ilmahayga yar ayaa ku adkaysta inuu soomo Ramadaanka, inkastoo soonku dhibayo yaraantiisa iyo caafimaad daradiisa awgeed, hadaba ma ku qasbaa inuu afuro?

Jawaab: Haddii ilmaha yari aanu qaangaadhin soonku kuma waajiba, hasayeeshee hadduu awoodo soonka tiiyonay dhibi ka soo gaadhayn waxa banaan in lagu amro, saxaabadauna Allaah ha ka raali noqdee caruurtooda ayay soon siin jireen illaa ka yari uu ooyo, waxayna siin jireen wuxuu ku ciyaaro si uu ugu maararoobo, hayeeshee haddii la arko inuu soonku dhibayo waa in loo diido. Allaah wuxuu inaga manciyay inaynu caruurta siino maalkooga haddii looga baqdo inay fasahaadiyaan (lumiyaan), sidoo kale waxa mudan in soonka laga manciyo haddii laga baqdo inuu jidhkooga dhibayo, hayeeshee waa in looga manciyo si aan qalafsanayn, waayo marka la tarbiyadaynayo ma banaana in sidaasi loola dhaqmo caruurta.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Cadayga

11. Su'aal: Waxa jira dad iska ilaaliya inay cadaydaan Ramadaan dhexdeeda iyagoo ka cabsanaya inuu soonku ka jabo, sidaasi ma saxbaa? Waqtiga ugu wanaagsan ee la cadayan karo Ramadaantu waa goorma?

Jawaab: wax saxa maaha in layska ilaaliyo cadayga maalmaha bisha Ramadaan iyo maalmaha kale ee qofku sooman yahay midna, waayo cadaygu waa sunne sida ku timid xadiiska saxiixa ah:

((مطهرة للف مرضة للرب))

((*Cadaygu afkana waa daahiriyya, Ilaahayna waa raali galiyaa*)).

In la cadaydaana waa arin mashruuca oo la adkeeyay xilliga salaada , waysada, marka hurdada laga toosayo iyo marka guriga la galayo, soon iyo soon la'aanba. Mana jabinayo soonka haddii aanu lahayn dhadhan candhuuftaada raacaya, haddii uu leeyahay dhadhana ha liqin dhadhankiisa, sidoo kale haddii dhiig ciridka ka soo daato adigoo cadayanaya ha liqin dhiiga, haddaad taasi iska ilaalisan waxba yeeli maayo soonkaaga.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Macjuunka Lagu Cadaydo

12. Su'aal: Ma u banaantahay qofka sooman inuu isticmaalo macjuunta ilkaha lagu cadayo maalin Ramadaan isagoo sooman?

Jawaab: Wax dhibi kuma jirto in la isticmaalo haddii layska ilaaliyo in la liqo wax macjuunta ka mida, waxana u banaan qofka sooman inuu cadaydo galinka hore iyo galinka dambaba. Culimada kuwo ka mida ayaa yidhi waa makruuh in la cadaydo zawaalka ka bacdi, kaasina waa qowl laga rajaxsan yahay, sida saxina waa in wax karaahiyi ku jirin, taana waxa daliil u ah caamnimada qowlka Nabiga (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ):

((السواك مطهرة للفم مرضة للرب)) أخرجه النسائي بإسناد صحيح عن عائشة رضي الله عنها

((*Cadaygu afkana waa daahiriyya, Ilaahayna waa raali galiyaa*). An-Naasi' ayaa sanad saxiixa kaga soo weriya Caa'isha (رضي الله عنها)).

Iyo qawlkiisa (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ):

((لولا أن أشق على أمتي لأمرتهم بالسواك عند كل صلاة)) متفق عليه

((*Haddii aanay ummadayda dhibaato ku noqon lahayn waxaan amri lahaa inay cadaydaan mar kasta oo ay tukanayaan*)).

Xukunkani wuxuu koobayaa salaada duhur iyo salaada casar, waqtigooguna waa zawaalka ka bacdi. Ilahay ayaa towfiiqda bixiya.

Sh.Ibnu Baaz

13. Su'aal: Waa maxay xukunka qofka sooman ee cadayda ama cedar marsada?

Jawaab: Waxa saxa inay sunne tahay inuu qofka soomani cadayan karo galinka hore iyo galinka dambe labadaba, caamnimada hadalka Nabiga (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) awgii:

((السواك مطهرة للفم مرضة للرب))

((*Cadaygu afkana waa daahiriya, Ilaahayna waa raali galiyaa*)).

Iyo hadalkiisa (صلی اللہ علیہ وسلم):

((لولا أن أشق على أمتي لأمرتهم بالسوق مع كل صلاة))

((*Haddii aanay ummadayda dhibaato ku noqon lahayn waxaan amri lahaa inay cadaydaan mar kasta oo ay tukanayaan*)).

Sidoo kale weeyi xukunka cadarku oo isna wuu u banaan yahay qofka sooman gelinka hore iyo gelinka dambe, waxana isku mida cadarka la marsado iyo uunsiga iwm. Haseyeeshee ma banaana inuu sanka ka nuugo bukhuurka (uunsiga) waayo bukhuurku wuxuu leeyahay saxarro la dareemi karo lana arki karo oo haddii la nuugo sankkiisa galeysa hadana caloosho galaysa, sidaa awgeed ayuu Nabigu (صلی اللہ علیہ وسلم) ugu yidhi Laqiid bin Sabira:

((بالغ في الإشتغال إلا أن تكون صائماً))

((*Sandaarsiga ku xeel dheerow, adigoo sooman mooyee*)).

Sh.Ibnu Cusaymiin

Qof Sooman oo Gows laga Saaray

14. Su'aal: Waa maxay xukunka qofka sooman oo gows iska saaray, miyuuse soonkiisii jabayaa?

Jawaab: Dhiiga soo daata marka gows layska saaro iyo wixii la midi soonka ma jabinayaan waayo ma laha raadka toobinta oo kale, sidaa awgeed soonka ma jabinayo.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Dhiigga Ka Yimaada Ciridka Qofka Sooman

15. Su'aal: Dhiiga ka soo baxa ciridka qofka soomani miyuu soonka jabinaya?

Jawaab: Dhiiga ka soo daadata ilkuhu wax raada kuma laha soonka, hasayeeshee waa intii la kari karo layska ilaaliyo in la liqo, waxa sidaasi la mida haddii qofiska ka gororo oo uu iska ilaaliyo inuu dhiigu dib uugu siibto (liqo), sidaasi waxba kuma jabna, qallana laguma laha.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Cadarku Ma Jabinayo Soonka

16. Su'aal: Waa maxay xukunka in qofka soomani isticmaalo cadar dharaarta Ramadaan?

Jawaab: Waxba kuma jabna inuu isticmaalo (marsado) iyo inuu ursadaba isagoo sooman, hayeeshee uma banaana inuu ursado (sanka ku nuugo) uunsiga (البحور) waayo wuxuu leeyhay jimidh (جرم) gaadhaya caloosha kaasi oo ah qiiqa.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Dawada lagu luqluqdo

17. Su'aal: Miyuu isticmaalka dawada lagu luqluqdaa (mouth wash) jabinaysaa soonka?

Jawaab: Maya, ma jabinayso soonka haduuna liqin oynaa wax ka midi caloosha galin, hayeeshee ha qaadan dawada adigoon u baahnayn.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Dawada Xiiqda

18. Su'aal: Waxaan qabaa cudurka xiiqda, dhakhtar ayaana ii sheegay inaan isticmaalo dawada xiiqda lagu daweyyo ee afka layskaga buufiyo. Waa maxay hadaba xukunka ku saabsan in aan isticmaalo dawadan xilliga aan soomanahay?

Jawaab: Bismilaah wal xamdu lilaah, Way banaantahay haddii aad ka maarmiweydo (daruuro kugu kalifto), hadalka Alle *caza wajalla* awgii:

وَقَدْ فَصَلَ لَكُمْ مَا حَرَّمَ عَلَيْكُمْ إِلَّا مَا اضْطُرَرْتُمْ إِلَيْهِ {الأنعام:119}.

{Isagoo (Alle) si faahfaahsan idinku Caddeeyey waxa uu idinka xarimay wixii daruuro idinku qabato mooyee}.

Sidoo kale dawada xiiqdu la mid maaha cunada iyo cabitaanka, waxay shabahdaa (dhinaca xukunka) dhiiga dadka laga shubo si loo baadho iyo irbadaha laysku mudo een jidhka aan siin nafaqada (Guluugooska iwm).¹

Sh.Ibnu Baaz

19. Su'aal: Waa maxay xukunka ku saabsan in Qofka soomani isku buufiyo dawada uu qaato qofka neefsigu ku dhibta yahay, miyayse soonka jabinaysaa?

¹ Xiiqda oo af Ingiriiska lagu magacaabo "asthma", dawada loo qaatana lagu isticmaalo qalab la yidhaahdo "asthma inhaler", culimo kale ayaa iyaguna yidhi soonka ma jabinayso waxa ka mida culimadaa: Sh. Sh. Ibnu Cusaymiin, Sh.Ibnu Jibriin iyo Golaha Joogtada ah ee Fatwada ee Sacuudi Careebiy. Eeg su'aasha numbarkeedu yahay (19) ee la weydiiyay Sh.Ibnu Cusaymiin. Culimo kale ooy ka mid yihiin Golaha Fatwada ee Azharka ayaa iyagu yidhi dawadani way jabinaysaa soonka.

Jawaab: Dawadan laysku buufiyaa way uumi-baxdaa mana gaadho caloosha, kolkaasi waxaan leenahay waxba kuma jabna in aad isticmaasho adigoo sooman, soonkuna kaama jabayo. Sidaan nidhi wax iyada ka midi caloosha ma galaan, waayo waa wax kala firdhaya, uumi-baxaya oo suulaya, jimidhkiisuna caloosha ma gaadho, sidaa darteed waxa kuu banaan inaad qaadato adigoo sooman, soonkuna kuma jabayo.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Gororku Ma jabiyo Soonka

20. Su'aal: Gororku miyuu jabiyyaa soonka?

Jawaab: Gororku ma jabiyo soonka xataa hadduu badan yahay, waayo maaha wax loo kasay.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Dhadhaminta Cuntada

21. Su'aal: Soonku miyuu ku jabaa dhadhaminta cuntada?

Jawaab: Soonku kuma jabo dhadhaminta cuntada haddii aan la liqin, hasayeeshee ha dhadhamin iyadoo baahi kuu geyso mooyee, markuu xaalku sidaa yahayna haddii ay cuntadu kugu siibato oo calooshaada gasho adigoon u kisin soonku kaama jabayo

Sh. Ibnu Cusaymiin

Xukunka in Qofka Soomani liqo Candhuufta Iyo Xaakada

22. Su'aal: Waa maxay in xukunka in qofka soomanii candhuufa liqo?

Jawaab: Wax dhibi kuma jirto in candhuufa la liqo, sidaan ogahayna culimadu arinkan iskuma khilaafin, waayo way adagtahay in layska ilaaliyaa, waxase waajiba in xaakada la soo tufo haddii ay afka soo gaadho, umana banaana qofka sooman inuu liqo, waayo waa layska ilaalin karaa lamana mid aha candhuufa. Ilaahay ayaa bixiya towfiiqda.

Sh.Ibnu Baaz

23. Su'aal: Waa maxay xukunka inuu qofka soomanii liqo xaakada?

Jawaab: xaakadu haddii ayna soo gaadhin afka ma jabinayso soonka khilaaf li' sida mad-habku yahay, haddiise ay afka soo gaadho oo haddana la liqo, arinkaa waxay culimadu ka yidhaahdeen laba ra'yi: qolo waxay yidhaahdeen soonka way jabinaysaa waxayna la mid tahay cunada iyo cabitaanka. Qolo kalena waxay yidhaahdeen soonka ma jabinayso oo waxay la mid tahay candhuufa, waayo candhuufto soonka ma jabinayso xataa haddii uu qofku candhuuftiisa ururiyo oo liqo soonkiisii ma jabayo.

Haddii ay culimadu is khilaafaana waxa marjac ah kitaabka iyo sunnaha, haddii aynu ka shakinay in arinkani jabinayo cibaadada iyo in kalena, waxa kolkaa asalku yahay in aanay jabayn, sidaa awgeedna liqida xaakadu ma jabinayso soonka.

Waxana muhiima innuu qofku iska dhaafo xaakada oonu isku dayin inuu u soo jiido xaga afkiisa isagoo ka keenaya dhuuntiisa hoose, haddiise ay afka u soo baxdo hayska soo saaro hadduu sooman yahay iyo haddii kaleba. In la yidhaahdo soonka way jabinaysaana waxa loo baahanyahay dalil qofka xujo u noqonay Ilaahay hortiisa.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Qof sooman oo Been sheegay

24. Su'aal: Miyuu sax yahay soonka nin markhaati beena (شهادة المؤرخ) furay?

Jawaab: Markhaatiga beenta ahi waxa uu ka mid yahay dambiyada waaweyn, wuxuuna yahay inuu qof ka markhaati kaco waxaanu ogayn amaba khilaafsan waxa uu ogyahay, soonkuse kuma jabayo, hasayeesh ee ajarkiisa ayaa ku nuqsaamaya.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Faa'iidada Soonka

25. Su'aal: Soonku miyuu leeyahay faa'iido bulsheed?

Jawaab: Haa wuu leeyahay faa'iidooyin bulsheed waxana ka mida inay dadku dareemaan in ummad dhammi waqtii isku mida wax cunayso, waqtii isku midana soomayso, ka maalka lihina uu dareemayo nicmada Ilaahay, una naxariisto ka faqiirka ah. Waxa kale oo uu yareeyaa simbiriirixoo yinka shaydaanka, waxa uu xaqijiyyaa cabsida Allaah, cabsida Allaahna waxay xoojisaa cilaaqada bulshada ka dhaxaysa.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Safarka Baneeya Afurka

26. Su'aal: Waa maxay safarka baneenaya in aan la soomin ?

Jawaab: Safarka baneenaya In aan la soomin iyo in salaadda la gaabiyo(qasriyo) waa ka le'eg 81.5 KM in ku dhow, culimadana waxa ka mida kuwo aan safarka u xadidin masaafad oo waxay yidhaahdeen wax kasta oo dadku u yaqaanaan safar waa in loo ictibaaro inuu yahay safar. Rasuulkii Allena

(صلى الله عليه وسلم) haduu safro in le'eg saddex Farsakh wuu qasrin jiray salaadda. Safarka xaaraanta ahina ma baneeyo qasrinta salaadda iyo afurka midna, waayo rukhsadu uma cuntanto safarka macsida ah. Culimada kuwo ka mida ayaa iyagu aan kala soocin safarka macsida iyo safarka daacada, guud ahaanta daliilka guud (caam ahaanta) awgeed. Allaah ayaa u cilmi leh.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Qofka sooman ee Safarku Dhib ku Yahay

27 Su'aal: Waaa maxay xukunka ku saabsan musaafir soonku dhib ku yahay?

Jawaab: Waa karaahi inuu soomo hadday suuragal tahay inuu soonku dhib ku keenayo, waayo Nabiga (صلى الله عليه وسلم) ayaa arkay nin inta loo hadheeyay dadna hareero joogaan kolkaasuu yidhi:

((ما هذا؟)) قالوا : صائم، فقال : ((ليس من البر الصيام في السفر)).

((Waa Ayo kani?) waxay yidhaahdeen: waa mid sooman, Wuxuu yidhi:(Samo falka kama mid aha in la soomo marka la safrayo)).

Waxase ku waajiba in aanu soomin haddii soonku ku keenayo dhib wayn, waayo markay dadku u sheegeen Nabiga inuu soonku dhib ku yahay wuu jabiyyay soonkiisii, ka dib ayaa loo sheegay in wali dadka qaarkood sooman yihiin, kolkaasuu yidhi:

((أولئك العصاة، أولئك العصاة))

((Kuwaasi way caasiyeen, kuwaasi way caasiyeen)).

Haddii aanu soonku dhib ku ahayn waxa fadli badan inuu soomo, si uu Nabiga (صلی الله علیہ وسلم) ugu daydo, illeen Nabigu (صلی الله علیہ وسلم) wuu soomi jiree, sida uu yidhi Abuu Dardaa:

((كَنَا مَعَ رَسُولِ اللَّهِ فِي رَمَضَانَ فِي حَرْ شَدِيدٍ، وَمَا مَنَا صَائِمٌ إِلَّا رَسُولُ اللَّهِ وَعَبْدُ اللَّهِ بْنُ رَوَاحَةَ))

((Anagoo Nabiga safar kula jirna oo ay aad u kulushay ooy Ramadaan tahay, ayaa waxa kaliya oo naga soomanaa Nabiga iyo Cabullaahi bin Rawaaxa)).

Sh. Ibnu Cusaymiin

28. Su'aal: Waa maxay xukunka soonka qofka safraya ee aanu soonku dhib ku ahayn waqtigan aynu joogno ee lagu safro gaadiidka casriga ah ?

Jawaab: Musaafirka way u banaanthay inuu soomo iyo inaanu soomin labaduba hadalka Alle awgii:

{وَمَنْ كَانَ مَرِيضًا أَوْ عَلَى سَفَرٍ فَعِدَّهُ مِنْ أَيَّامِ أُخْرَ} البقرة:185.

{Qofkii buka ama safar ah waxa saaran tiro maalmo kale}.

Saxaabodu markay Nabiga (صلی الله علیہ وسلم) la safraan qaarna way soomi jireen, kuwo kalena may soomi jirin, qofka soomani ceeb uma arag midka afuran, ka afuranina muu ceebayn midka sooman. Nabiguna (صلی الله علیہ وسلم) Isagoo safar ku jira ayuu soomi jiray, Abuu Dardaa ayaa yidhi:

((كَنَا مَعَ رَسُولِ اللَّهِ فِي رَمَضَانَ فِي حَرْ شَدِيدٍ، وَمَا مَنَا صَائِمٌ إِلَّا رَسُولُ اللَّهِ وَعَبْدُ اللَّهِ بْنُ رَوَاحَةَ))

((Nabiga ayaanu la safarnay iyadoo ay aad u kulushay ooy Ramadaan tahay, waxa kaliya oo naga soomanaa Nabiga iyo Cabullaahi bin Rawaaxa)).

Waxa asal ah in qofka musaafirka ah la kala dooransiiyo inuu soomo iyo inaanu soomin, laakiin haddii aanu soonku dhib ku ahayn inuu soomo ayaa u fadli badan, waayo seddex faa'iido ayuu ka helayaa:

Kow: Inuu Rasuulkii Alle (صلی اللہ علیہ وسلم) ku daydo.

Laba: Fudayd, qofka waxa u fudud inuu dadka la soomo markay sooman yihiin.

Seddex: Waajibka soonka ee qofka saaran oo si dhakhso ah layskaga rido.

Haddiise soonku dhib ku yahay inuu soomo maaha, mana wanaagsana in qofka safraya soomo xaalandan oo kale, waayo mar uu Rasuulkii (صلی اللہ علیہ وسلم) arkay nin loo hadheeyay dadna ku dul urursanyihiin ayuu yidhi:

((ما هذا؟)) قالوا : ((ليس من البر الصيام في السفر)).

((Waa ayo kani?) waxay yidhaahdeen: waa mid sooman, Wuxuu yidhi:(Samo falka kama mid aha in la soomo marka la safrayo)).

Xukunkan ayaa lagu dabaqayaa qofka xaalkiisu la mid yahay ta ninkan oo kale ee soonku ku dhib yahay.

Sidaa awgeed waxaanu leenahay: waqtigan aynu joogno safarku waa sahal, sida qofka su'aasha ina waydiiyay yidhi, oo sida badan ee qaalibka ah dhib maaha in la soomo, kolkaa haddii aanu soonku dhib ahayn marka la safrayo waxa fadli badan in la soomo.

Sh. Ibnu Cusaymiin.

Qofka Safraya Wuxa u Fadli Badan Inuu Afuro Xataa Safarku ayuuna Dhib ku Ahaane

29. Su'aal: Abuu Saami oo reer Xaa'il ah ayaa yidhi: Imaamka masaajidka ayaa marwalba ku yidhaahda dadka: “qofkii safraya Ramadaan ee aan soomini wuxuu leeyahay laba ajar, ajarka inuu qaatay rukhsada iyo ajarka qallaha. Ma waxa jira axaadiis ku saabsan mowduucan? Jazaakumu Allahu khayran.

Jawaab: Qofka xanuunsanaya ama safraaya waxa u banaan inuu soonka iska daayo (afuro), balse sidaasi ayaa u wanaagsan hadalka Alle awgii:

{وَمَنْ كَانَ مَرِيضًا أَوْ عَلَى سَفَرٍ فَعِدَّهُ مِنْ أَيَّامِ أُخْرَ} البقرة:185.

{Qofkii buka ama Safar ah waxa saaran tiro maalmo kale}.

Iyo Hadalka Nabiga (صلى الله عليه وسلم):

((إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ أَنْ تَؤْتَى رِحْصَهُ كَمَا يَكْرَهُ أَنْ تَأْتَى مُعَصِّبَتِهِ))

((Alle wuu jecelyahay in rukhsadiisa la qaato, siduu u neceb yahay in isaga la caasiyo)).

Waxase shardi ah in soonku dhib ku yahay qofka xanuunsanaya, haddiise aanu soonku dhib ku ahayn uma banaana inuu afuro, waayo ma laha cudurdaar, Alle ayaana towfiiqda bixiya.

Sh.Ibnu Baaz

Xukunka in La afuro Haddii lagu Safrayo Gaadiidka Casriga ah

30. Su'aal: Qofka ku safra gadiidka casriga ah miyay u banaantahay inuu afuro Ramadaan?

Jawaab: Allaah waxa uu yidhi:

{وَمَنْ كَانَ مَرِيضًا أَوْ عَلَى سَفَرٍ فَعِدَّهُ مِنْ أَيَّامِ أُخْرَ} البقرة:185.

{Qofkii buka ama safar ah waxa saaran tiro maalmo kale}.

Kolkaasi si mudlaqa (oon dabranayn) ayuu Alle u baneeyay in marka la safrayo la afuro, Nabiguna (صلى الله عليه وسلم) waxa uu yidhi:

((إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ أَنْ تَؤْتَى رَحْصَهُ كَمَا يَكْرَهُ أَنْ تَأْتَى مَعْصِيَتِهِ))

((Alle wuu jecelyahay in rukhsadiisa la qaato, siduu u neceb yahay in isaga la caasiyo)).

In la afuro oon la soomin marka la safrayaan waa sunne sida Nabiga iyo saxaabadiisii sameeyeen. Haddiise uu qofka muslinka ahi ogaado in haddii uu afuro intuu safarka ku jiro uu hadhow qalluhu ku adkaanayo oo ay dhibi kaga imanayso, haddii uu sababtaa darteed u soomo isagoo safarka ku jira, sidaasi waa khayr, oo waxba kuma jabna, waxana isku mida haddii uu ku safrayo gaadiid sahala iyo haddii kaleba. Waxaynu sidaa u nidhi waa adilada oo mudlaqa awgeed. Alle ayaa towfiiqda bixiya.

Sh.Ibnu Baaz

31.Su'aal: Qofka safraya ma waxa u fadli badan inuu soomo mise inuu afuro, Khaasatan safarka aan dhibta lahayn, sida safarka diyaaradaha iyo gaadiidka casriga ah ee kale?

Jawaab: Gabi ahaanba waxa qofka safraya u fadli badan inuuna soomin oo uu afuro, hadduu soomana waxba kuma jabna, waayo Nabiga ayey labada arinba ka sugmeen, sidoo kale saxaabada ayay iyana ka sugmeen. Hasayeeshee haddii uu (kulayl) badani jiro ooy dhibto waynaato, waa inuu afuro qofka safrayaan, inuu soomaana waa karaahiyo oo ma wanaagsana. Waayo Nabiga (صلى الله عليه وسلم) ayaa markuu arkay nin loo hadheeyay isagoo safraya oo sooman, kulayl awgii ayuu yidhi:

((لَيْسَ مِنَ الْبَرِّ الصَّوْمُ فِي السَّفَرِ)).

((Samaha kama mid aha in la soomo marka la safrayo)).

Waxa kale oo Nabiga (صلی اللہ علیہ وسلم) ka sugan inuu yidhi:

((إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ أَنْ تَؤْتَى رِخْصَهُ كَمَا يَكْرَهُ أَنْ تَأْتَى مُعَصِّيَتِهِ))
وفي لفظ: ((كما يحب أن تأتى عزائمه)).

((Alle wuu jecelyahay in rukhsadiisa la qaato, siduu u neceb yahay in isaga la caasiyo).)

Wax farqi ahina uma dhaxeeyo qofkii ku safraya gawaadhi, awr, doonyo, maraakiib iyo qofkii ku safraya diyaarado, . Waayo dhamaantood waxa ku dhaboobaya magaca safarka(yacnii waa wada musaafiriin), waxaana u banaan inay qaataan rukhsada safarka. Allena axkaanta safarka iyo nagaantaba wuxuu u jideeyay adoomiisa dhammaantood, kuwii noolaa waqtigii Nabiga iyo kuwa iyaga gadaashood iman doona ilaa maalinta qiyaamaha.

Allena waa ogyahay waxa dhici doona ee ah xaaladaha isbedeli doona, iyo noocyada kala duwan ee gaadiidka safarka. Haddii xukunkoogu kala duwanyahayna Alle subxaanahuu wuu caddayn lahaa sida *caza wajal* ku yidhi suurat An-Naxl:

{وَنَزَّلْنَا عَلَيْكَ الْكِتَابَ تِبْيَانًا لِكُلِّ شَيْءٍ وَهُدًى وَرَحْمَةً وَبُشْرَى لِلْمُسْلِمِينَ} النحل:89.

{Waxaan korkaada ku dejinay kitaabka oo ah caddaynta wax kasta, oo hanuun iyo naxariis iyo bishaaro u ah Muslimiinta}

{وَالْخَيْلَ وَالْبَغَالَ وَالْحَمِيرَ لِتَرْكُبُوهَا وَرِزْنَةٌ وَيَخْلُقُ مَا لَا تَعْلَمُونَ} النحل:8.

{Fardaha iyo baqlaha iyo dameeraha wuxuu (Alle idiinku abuuray) inaad fuushaaan iyo qurux ahaan, wuxuuna abuuraan waxaydaan u cilmi lahayn}

Sh.Ibnu Baaz

Suxuurtu Shardi Uma Aha Ansixidda Soonka

32. Su'aal: Qof intuu niyaystay soonkii Ramadan oo seexday isagoon suxuuran illaa waabariga ka dib, qofkaasi soonkiisu ma sax baa mise maaha?

Jawaab: Soonkiisu waa sax, waayo suxuurtu shardi uma aha ansixida soonka, waase mustaxab hadalka Nabiga (صلی اللہ علیہ وسلم) awgii:

((تسحروا فإن في السحور بركة)) متفق عليه

((*Suxuurta waayo barako ayey leedahay suxuurtuye*))

Sh.Ibnu Baaz

Barakada Suxuurta

33. Su'aal: Waxuu Nabigu yidhi: (صلی اللہ علیہ وسلم) ((تسحروا فإن في السحور بركة)) (*Suxuurta waayo barako ayey leedahay suxuurtuye*)) maxaa looga jeedaa barakada suxuurta?

Jawaab: Barakada suxuurta waxaa looga jeedaa waa barakada sharciga ah iyo barakada jidhka, barakada sharciga ah waxa ka mida in lagu camalfalo amarka Rasuulka iyo in isaga lagu daydo. Barakada jidheedna waxa ka mida inay jidhka quudinayso una xoojinayso soonka.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Dad ku Nool Dhul ay Maalintu Dheertahay

34. Su'aal: Waxaanu deganahay dhul ay cadceeddu dhacdo sagaalka iyo badhka ama tobanka iyo badhka, ee goormaanu afurnaa?

Jawaab: Waxaydun afuraysaan markay cadceedu (qoraxdu) dhacdo, maadaama aad leediihiin habeen iyo maalin ka kooban 24 saacadood waxa idinku waajiba inaydun soontaan haba dheeraato maalintuye.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Fiiro: Su'aalo badan ayaa layska weydiyyaa masaladan, jawaab iyo fatwo la mida tan Sh.Muxammad (رحمه الله) ayaa waxa soo saaray Gudida Culimada waaweyn markay taariikhdu ahayd 4/12/1398, iyagoo ka jawaabaya su'aal looga soo diray dalka Sweden, kuna saabsanayd sida looga soomayo loogana tukanayo meelaha maalintu dheeraato waqtiga xagaaga, jiilaalkiina gaabato, iyo dhulalka qaarkood ooyna cadceedu dhicin xiliga xagaaga.

Jawaabta ay ka bixiyeen culimadu sida looga soomayo meelaha ay maalintu dheeraato waxay ahayd sidan:

(وَمَا بِالنَّسْبَةِ لِتَحْدِيدِ أَوْقَاتِ صِيَامِهِمْ شَهْرُ رَمَضَانَ فَعَلَى الْمَكْفُونِ أَنْ يَمْسِكُوا كُلَّ يَوْمٍ مِنْهُ عَنِ الطَّعَامِ وَالشَّرَابِ وَسَائِرِ الْمَفْطَرَاتِ مِنْ طَلَوْعِ الْفَجْرِ إِلَى غُرُوبِ الشَّمْسِ فِي بَلَادِهِمْ مَا دَامَ النَّهَارُ يَتَمَاهِي فِي بَلَادِهِمْ عَنِ اللَّيلِ، وَكَانَ مَجْمُوعُ زَمَانِهِمْ أَرْبَعاً وَعَشْرِينَ سَاعَةً. وَيَحْلُّ لَهُمُ الطَّعَامُ وَالشَّرَابُ وَالْجَمَاعُ وَنِحْوَهَا فِي لَيْلَهُمْ فَقَطْ وَإِنْ كَانَ قَصِيرًا، فَإِنْ شَرِيعَةُ الْإِسْلَامِ عَامَةٌ لِلنَّاسِ فِي جَمِيعِ الْبَلَادِ، وَقَدْ قَالَ اللَّهُ تَعَالَى: {وَكُلُّوا وَاשْرُبُوا حَتَّىٰ يَتَبَيَّنَ لَكُمُ الْخَيْطُ الْأَبْيَضُ مِنَ الْخَيْطِ الْأَسْوَدِ مِنَ الْفَجْرِ ثُمَّ أَتِمُّوا الصِّيَامَ إِلَى اللَّيْلِ}، وَمَنْ عَجزَ عَنِ إِتَامِ صَوْمِ يَوْمٍ لِطُولِهِ، أَوْ عَلِمَ بِالْأَمَارَاتِ أَوِ التَّجْرِيَةِ، أَوْ إِخْبَارِ طَبِيبِ أَمِينِ حَادِقِ أَوْ غَلْبِ عَلَىٰ ظَنِّهِ أَنَّ الصَّوْمَ يَفْضِي إِلَىٰ إِهْلَكِهِ أَوْ مَرْضِهِ مَرْضًا شَدِيدًا، أَوْ يَفْضِي إِلَىٰ زِيَادَةِ مَرْضِهِ أَوْ بَطْءِ بَرَئَهِ أَفْطَرَ، وَيَقْضِي الأَيَّامَ الَّتِي أَفْطَرَهَا فِي أَيِّ شَهْرٍ تَمْكُنَ فِيهِ مِنَ الْقَضَاءِ. قَالَ اللَّهُ تَعَالَى: {فَمَنْ شَهِدَ مِنْكُمُ الشَّهْرَ فَلْيَصُمُّهُ وَمَنْ كَانَ مَرِيضًا أَوْ عَلَىٰ سَفَرٍ فَعِدَّهُ مِنْ أَيَّامٍ أُخْرَ}، وَقَالَ اللَّهُ تَعَالَى: {لَا يُكَلِّفُ اللَّهُ نَفْسًا إِلَّا وُسْعَهَا} ، وَقَالَ: {وَمَا جَعَلَ عَلَيْكُمْ فِي الدِّينِ مِنْ حَرَجٍ}.)

“Dhinaca xadidida waqtiyada soonka bisha Ramadaana waxa dadka mukalifiinta ah ku waajiba inay maalin walba oo Ramadaana ka tagaan cunada, cabitaanka iyo wax walba oo soonka jabiya laga bilaabo waabariga ilaa ay cadceedu ka dhacayso dhulkooda (meeshay joogaan) maadaama ay maalinta iyo habeenkku kala soocan yihiin, oo wadarta saacadaha habeenkha iyo maalintuna yihiin afar iyo laabatan saacadood. Waxana u xalaala cunada iyo cabitaanka iyo galmoodka

iwm intay habeenka tahay haba gaabnaadee. Shareecada Islaamkuna waxay koobaysaa dadka oo dhan meel walba ooy joogaan. Ilaahay (تعالى) wuxuu yidhi: {Cuna oo caba ilaa ay idiin kala cadaadaan khadka cad (waaga) iyo khadka madow (habeenka) ee waqtiga fajarku, soonkana dhamaystira ilaa habeenka}.

Qofkiise kari waaya inuu soonka dhameeyo dheeraanta maalinta awgeed, ama ku ogaaday calaamado ama tijaabo, ama uu u sheegay dhakhtar aamini oo xariifi, ama ay maliiisa ka qaalib noqotay inuu soonku halaagayo, ama uu ku keenayo xanuun aadag, ama uu ku kordhinayo xanuun hore u hayay, ama uu dib u dhigayo ka bogsashada xanuun haya, markaasi wuu afurayaa waxana ku waajiba inuu qaleeyo maalmuhuu afuray biliha uu awoodi karo (yacnii waqtiguu awoodo).

Allaah (تعالى) wuxuu yidhi: {Qofkii idinka mida ee bisha arkaa ha soomo, qofkii buka ama safar ahna waxa saaran tiro maalmo kale}.

Allaah (تعالى) wuxuu yidhi: {Kuma kalifo Ilaahay naf waxay awoodo mooyee}.

Allaah (تعالى) wuxuu yidhi: {Allaah dhib idinkagama dhigin diinta}.”

Culimada fatwadan bixisay waxa ka mid ahaa Sheekh Cabdulcasiis bin Baaz, Wuxaan ka eegtaa buuggiisa: "تحفة الإخوان", b:164. Wuxaan kaloo ka eegtaa buuga fataawada Sheekha: "مجموع فتاوى ومقالات متنوعة", 15/292-300. (Tarjumaha).

Bisha Ramadaan Ma Noqon Kartu 28 Maalmood

35. Su'aal: Ma banaantahay in la soomo bisha Ramadaan 28 maalmood oo kaliya?

Jawaab: Waxa ku sugar axaadiista ka shaac baxday Rasuulkii Ilaahey inayna bishu ka yaraan karayn sagaal iyo labaatan maalmood, markay si cad oo sharchiya u sugnaato inay bishii Shawaal bilatay tiiyooy muslimiintu soomeen siddeed iyo labaatan maalmood waxa hubaala inay afureen maalintii ugu horaysay bisha Ramadaan, sidaa awgeed waxa waajib ku ah inay qalleeyaan maalintaa waayo suurogal maaha inay bishu noqoto siddeed iyo labaatan maalmood, bishuna waxay noqon kartaa sagaal iyo labaatan ama soddon cisho.

Sh.Ibnu Baaz

Qubaysiga Janaabada oo Dib Loo Dhigo

36. Su'aal: Ma banaantahay in ka maydhashada jinaabada dib loo dhigo illaa waabariga (طلع الفجر), dumarkase ma u banaantahay inay dib u dhigaan ka maydhashada xaydka ama nifaaska illaa waabariga?

Jawaab: Haddeey qofka dumarka ahi aragto inay daahir tahay (caadadii ka joogsatay) waabariga hortii waxa ku waajiba inay soonto waxbana kuma jabna inay maydhato (qubaysato) waabariga ka dib, hasayeesh ee uma banaana inay maydhashada dib u dhigto ilaa cadceedu soo baxayso balse waxa ku waajiba inay maydhato ooy tukato intaanay cadceedu soo bixin. Qofka jinaabada leh isagana uma banaana inuu maydhashada dib u dhigo illaa ay cadceedu soo baxayso balse waxa ku waajiba inuu maydho, tukadana salaadda subax intayna cadceedu soo bixin, hadduu nin yahayna waxa ku waajiba inuu degdego si uu salaadda subax ula tukado jamaacada.

Sh.Ibnu Baaz

Soonku Kuma Jabo Ixtilaamka

37. Su'aal: Haduu qof ixtilaamu (jinaaboodo isagoo hurda) maalin Ramadaan dhexdeed miyuu soonkiisii jabay, miyayse ku waajib tahay inuu dhakhsu u maydho (qubaysto)?

Jawaab: Ixtilaamku ma jabinayo soonka waayo waa wax ka baxsan ikhiyaarka qofka, waxase qofka ku waajiba inuu ka maydho (qubaysto) janaabada. Hadduu xitaa ixtilaamo salaadda subax ka dib oo uu maydhashada dib u dhigo ilaa waqtiga salaadda duhur laga gaadhayo waxba kuma jabna, sidoo kale hadduu habeenkii jimaaco (u galmoodo) xaaskiisa dabeetana maydhashada dib u dhigo ilaa waabariga iyana way u banaan tahay, waayo waxa Nabiga ka sugaran inuu waabariisan jiray isagoo janaabo qaba jimaac dartii, dabeetana intuu maydho uu soomi jiray. Sidoo kale haddii qofka dumarka ah ee xaydka ama nifaaska lihi daahir noqoto habeenka ooyna maydhan ilaa waabariga way u banaantahay sidaasi, soonkooduna waa sax. Haseyeeshee uma banaana inay maydhashada ama salaadda dib u dhigaan illaa laga gaadhayo cadceed soobaxa ka dib, balse waxa dhammaantood ku waajiba inay maydhashada dedejiyaan cadceed soobaxa ka hor si ay salaadda u tukadaan waqtigeeda. Waxa kaloo ninka ku waajiba inuu si degdeg ah uuga maydho janaabada intaanay cadceedu soo bixin ka hor si ay uugu suura gasho inuu salaadda la tukado jamaacada. Ilaahey aaya tawfiiqda bixiya.

Sh.Ibnu Baaz

38. Su'aal: Al-Akh (m.w.a) aaya leh: Anigoo sooman ayaan masaajidka seexday, markaan toosay ayaan arkay inaan ixtilaamay, hadaba miyuu soonku ku jabayaa ixtilaamka, waxaanan kuu sheegayaa inaan tukaday anigoon ka maydhan janaabadii.

Jawaab: Ixtilaamku ma jabinayo soonka waayo waa arrin ka baxsan ikhiyaarka adoonka (qofka), waxase qofka ku waajiba inuu janaabada ka maydho haddii ay mani ka soo baxdo, waayo Nabiga aaya markii la waydiyyay arinkani ku jawaabay in qofka ixtilaamay haddii biyo (mani) ka yimaadaan ay maydhasho ku waajib tahay. Inaad tukato adigoon ka maydhan janaabadii waa khalad iyo munkar (arrin xun) wayn, waxana kugu waajiba inaad salaaddaa dib u tukato, Allena subxaanuhuu aad u toobad keento. Dhagaxa madaxa kaaga

dhacay ee dhiiga ka shubay kaama jabinayo soonka. Mataga aanad iska keenin isaguna kaama jabinayo soonka, waayo Nabiga ayaa yidhi:

(من ذرعة القيء فلا قضاء عليه ومن استقاء فعليه القضاء) رواه أحمد وأهل السنن بإسناد صحيح.²

((Qofkii matagu ka xoog bato qalle laguma laha, qofkii isagu iska matajiyana waxa ku waajiba qalle)). Axmed iyo ehlu sunanka ayaa ku soo wariyay sanad saxiixa.

Sh.Ibnu Baaz

Qof Sooman oo Ixtilaamay

39. Su'aal: Qofka isagoo sooman ixtilaamay soonkiisu ma saxbaa?

Jawaab: Haa, soonkiisu waa sax waayo ixtilaamku ma jabiyo soonka, maxaa yeelay waa wax aanu qofku ikhtiyaar u lahayn, iinsaankana qalinka waa laga kor qaaday markuu hurdo(takliifi ma saarna). Wuxuu munaasaba in aan dadka ku baraarujiiyo arin ay dad badani sameeyaan xiligan oo ah inay habeenada Ramadaan saamo laylaan (soo jeedaan), waxaana dhici kartaba inay ku soo jeedaan wax dhibaya oon anfacayn, ka bacdina ay dharaartii oo dhan ku dhamystaan hurdo. arinkaasi waa mid aan haboonayn, waxase loo baahanyahay inuu qofku soonkiisa ka yeelo waqtii uu badsado daacada, dikriga, akhrinta Qur'aanka iyo wixii kale ee u dhawaynaya Allaah, isagaa barako badnaaday oo koreeyee.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Soonka Qallaha ah oo Dib Loo Dhigo

40. Su'aal: Waxaan ahay haweenay (marwo) xanuunsanaysa, waxana dhacday inaan afuray maalmo ka mida Ramadaantii sanadkii hore, waanan awoodi kari waayay inaan qalleeyo xanuunka dartii, hadaba waa maxay kafaarada igu waajibka ahi?

Jawaab: Qofka xanuunsanaya ee soonku ku adagyahay waxa u banaan inuu afuro, markuu Ilaahey caafimaad siiyana waxa ku waajiba inuu qalleeyo siduu Alle yidhi:

{وَمَنْ كَانَ مَرِيضًا أَوْ عَلَى سَفَرٍ فَعِدَّهُ مِنْ أَيَّامِ أُخْرَ} البقرة:185.

{Qofkii buka ama safar ah waxa saaran tiro maalmo kale}.

Ta su'aasha na waydiisay waxaan ku leeyahay (u sheegayaa), waxba kuma jabna bishii aanad soomin haddii xanuunku wali ku hayey, waayo afurku waa rukhsad Ilaahey siiyey qofka xanuunsanaya iyo ka safraya, Ilaaheyina wuxuu jecelyahay in rukhsaddiisa la qaato siduu u karho in la caasiyo, wax kafaaro gud ahina kuma saarna, haseyeeshee qalle ayaa lagugu leeyahay markuu Ilaahey caafimaad ku siiyo. Ilaahey ha kaa bogsiyo wixii dhib ah oo dhan, anaga iyo adigana ha asturo xumaanteena.

Sh.Ibnu Baaz

Qofka Safraya iyo Soonka

41. Su'aal: Ramadaan dhexdeeda ayaanu ka safraynaa magaalada Riyaad, diyaaradduna waxay nala kici doontaa aadaanka maqrib saacad hortii haddii Ilaahey yidhaahdo, salaadda maqribna waxa la adimi doonaa anagoo wali hawada Sucuudiga ku jirna, hadaba miyaano afurnaa? Haddii aanu cadceeda aragno anagoo hawada ku jirna miyaanu wali soomanaanaa si aanu ugu afurno dalkayaga mise waxaanu ku afurnaa aadaanka Sucuudiga?

Jawaab: Tusaale ahaan, haddii ay diyaaraddu ka kacdo Riyaad maqribka hortii iyadoo u jeeda dhinaca cadceed ka dhaca waxa kugu waajiba inaad soomanaatid

illaa ay cadceeddu dhacayso inta aad hawada ku jirtid ama aad ku degayso dhul ay cadceeddu u dhacday siduu Nabigu yidhi:

((إذا أقبل الليل من هنا وأدبر النهار من هنا وغرت الشمس فقد أفتر الصائم) متفق على صحته)

((*Haddii habeenku dhinacaa ka soo galo, maalintuna dhinacaa kasii jeedsato, cadceedduna dhacdo wuu afuray qofkii soomanaa*)) saxnimadiisa waa laysku waafaqay.

Sh.Ibnu Baaz

Dawada Indhuuhu Soonka Ma Jabiso

42. Su'aal: Miyay banaantahay in dawada isha lagu shubo (dhibqiyo) la isticmaalo maalinta Ramadaan dhexdeeda (tiiyoo la soomanyahay) miyayse soonka jabinaysaa?

Jawaab: Sida saxa ahi waa inayna dawada indhaha lagu shubaa soonka jabinaynin, inkastoo culimadu isku khilaafeen oo qaarkood yidhaahdeen way jabinaysaa haddii dhadhankeedu cunaha gaadho. Sida saxina waa inayna soonka sinaba u jabinaynin, waayo ishu maaha meelay wax maraan (منفذ), hasa yeeshee hadduu qofku qaleeyo taxadir aawadii iyo inuu ka baxo khilaafka culimada darteed (إحتياطاً وخروجًا من خلاف العلماء), taasina waxba kuma jabna, hasa yeeshee waxa saxa inayna dawada isha ama dhagta layskaga shubaa soonka jabinaynin.

Sh.Ibnu Baaz

Dawada Xaydka (caadada dumarka) Joojisa

43. Su'aal: Ma ii banaantahay mise iima banaana inaan isticmaalo kiniin (dawo) iga joojiya xaydka (caadada dumarka) bisha Ramadaan dhexdeeda?

Jawaab: Way banaantahay inay qofka dumarka ahi isticmaasho dawooyin ka joojiya xaydka bisha Ramadaan dhexdeeda haddii ay dhakhtaro khibrad leh oo lagu kalsoon yahay iyo kuwo iyaga la midi gartaan in arinkani aanu dhibaato u keenayn iyada, habkeeda dhalmadana aanu dhib u gaysanayn. Waxase u khayr badan inay arinkan ka fogato, Allaana rukhsad u siiyay inay afuri karto haddii ay xayd yeelato bisha Ramadaan dhexdeeda, wuxuuna u baneyay inay maalmihii ka tagay qallayso, sidaasuuna uuga raali noqday diin ahaan.

Sh.Ibnu Baaz

44. Su'aal: Haddii qofka dumarki isticmaasho (qaadato) maalmaha ay leedahay nifaaska ama xaydka wax ka joojiya dhiiga, waa maxay xukunka arinkaasi?

Jawaab: Haddii ay qofka dumarki isticmaasho kiniin ama irbado dhiiga ka joojiya, oo sidaasi dhiigu kaga joogsado ooy ka dib maydhato, waxa u banaan inay u camal fasho sida dumarka daahirka ah. Salaadeeda iyo soonkeeduna waa sax.

Sh.Ibnu Baaz.

45. Su'aal: Bisha Ramadaan ma u banaantahay qofka dumarka ah in dawada uurka joojisa u isticmaasho sidii xaydka dib loogu dhigi lahaa?

Jawaab: Waxba kuma jabna, waayo maslaxad ayaa dumarka uugu jirta, taasi oo ah inay la soonto dadka oon qalle lagu yeelan . Waxase loo baahan yahay in fiiro loo yeesho in dhibi aanay ka iman, waayo dumarka qaarkood kiniinkani (dawadani) dhib ayuu ku keenaa.

Sh.Ibnu Baaz

46. Su'aal: Dumarka qaarkood ayaa si joogto ah bisha Ramadaan qaata dawo ka joojisa xaydka (caadada bisha), iyagoo u jeeda si ayna caado u yeelan , una soomaan bisha Ramadaan oo dhan, maalin kaliyina u dhaafin. Camalkani ma sax baa?

Jawaab: Anigu ma arko in arinkani dhib leeyahy, haddii aanu dumarka dhib u gaysan. Mana garanayo wax dambiya oo ku jira, waayo maslaxad wayn ayaa ugu jirta, taasoo ah inay dadka la soomaan oon qalle lagu yeelan.

Sh.Ibnu Baaz

Gabadh Jahli Awgii Soontay Iyadoo Xayd leh

47. Su'aal: Haweenay ayaa leh: Ramadaantii ugu horraysay ee ay xayd yeelatay oo cimrigeeduna ahaa seddex iyo toban jir, ayaa way tukan jirtay oo soomi jirtay, maalmahaay ay iyadoo xayd leh soontayna dib umay qalleen. Wuxaan intaa ku darayaa inayna aqoon u lahayn inay xaaraan tahay in la soomo waqtiga xaydka iyo inay waajib tahay in la qalleeyo Ramadaan ka dib. Sanado badan ayaa iminka ka soo wareegay ee miyay qalaynaysaa? Noo faa'iideeya Alle hayadanka Jazo siiyee?

Jawaab: Kow: Uma banaana xaa'idada inay soonto iyo inay tukato midna mudada ay xaydka leedahay, ficolka ay ku kacday gabadha la sheegay, oo ah inay soontay ooy tukatay iyadoo xayd lihi waa qalad, waxana ku waajiba inay Alle u toobad keento oo dambidhaaf waydiisato, Maxaa yeelay looguma cudurdaarayo jahliga ay ka jaahilka ahayd xukunka la xidhiidha arinkan oo kale, waayo waxa ku waajiba inay wax su'aasho.

Laba: Wuxa ku waajiba inay qallayso dhammaan maalmihii ay xaydka lahayd Ramadaan dhixdeeda, ha noqoto Ramadaan kaliya ama dhowr Ramadaane. Soonka ay soontay mudada ay xaydka lahaydna kama gudayo waajibkii saarnaa,

ee waa inay qallayso oo ay waliba maalinwalba oo dhaaftay ka bixiso fidyo ah inay miskiin quudiso saac badhkii oo ah cunada dhulkeeda laga cuno.

Sh.Ibnu Baaz

Gabadh Yar oo jahli Awgii Soomi Jirtay Iyadoo Xayd Leh

48. Su'aal: Maxaa ku waajiba gabadh yar oo jahli awgii soomi jirtay maalmahay xaydka lahayd?

Jawaab: Wuxuu ku waajiba inay qallayso soonkay soomi jirtay maalmihii ay xaydka lahayd, waayo soonka lama aqbalo maalmaha ay xaydka leedahay, kamana ansaxayo haddii ay soonto xitaa haddii ay ka jaahil (ahayd), qallahana waqtigii su xad ma laha.

Waxa jirta Masa'lo ku lida (caksi ku ah) masa'ladan: Qof dumara oo xaydku ka yimid iyadoo yar kana xishootay inay reerkeeda u sheegto, sidaa awgeedna aan soomi jirin, gabadhan waxa ku waajiba inay qallayso bishii ayna soomin, waayo haddii gabadha xayd ka yimaado waxay noqonaysaa qaangaadh (baaliq), maxaa yeelay xaydku waxa uu ka mid yahay calaamadaha lagu garto qaangaadhka.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Hawayney Nifaaskii ka Daahirowday Wiig ka Dib

49. Su'aal: Haddii qofta nifaaska lihi daahir noqoto wiig dhexdii oo ay maalmo dhowra la soonto muslimiinta Ramadaan dhexdeeda, oo haddana dhiigii dib u soo noqdo miyay afuraysaa? Teeda kale miyay ku waajib tahay inay qalayso maalmihii ay soontay iyo kuwii ay afurtayba?

Jawaab: Haddii ay qofka dumarka ah ee nufasadi daahir noqoto afartanka maalmood dhexdooda oo ay maalmo soonto oo haddana dhiigu ku soo noqdo afartanka dhexdooda, soonkeeduna waa sax waxana ku waajiba inay joojiso salaadda iyo soonkaba maalmaha uu dhiigu ku soo noqday-waayo waa nifaasilaa ay daahir noqoto ama ay afartan baxdo, marka ay afartan baxdana waxa ku waajiba in ay maydhato xataa haddii ayna isku arag wax dhiiga; waayo sida ugu saxan hadalada culimada wuxuu nifaasku ku dhamaadaa afartan maalmood. Intaa ka dibna waxa ku waajiba inay salaad kastaba u waysaysato markuu waqtigeedu soo galo ilaa uu dhiigu ka istaagayo, siduu Nabigu (صلى الله عليه وسلم) ku amray mustaxaadada (gabadha uu dhiigu si joogtada ah uga socdo), ninkeedana waxa u banaan inuu ku raaxaysto (jimaaco) iyada markay gaadho afartan maalmood xataa haddii wali dhiigii ka socdo, waayo dhiiga aynu soo tilmaamnay waa dhiig cudur (maaha nifaas) sidaa awgeed ma (manciyayo) salaada iyo soonka, kamana(mancinayo) ninkeeda inuu ku raaxaysto. Hayeeshee haddii dhiiga ka yimaadda afartanbaxa ka dib uu waafaqo xilligii ay xaydka (caadada) yeelan jirtay waxa ku waajiba inay ka dhigto (u ictibaarto) xayd ooy ka joogsato salaadda iyo soonka.

Sh.Ibnu Baaz

Xukunka Soonka Haweenay uu Nifaaskii Ka joogsaday Afartanbaxa Ka Hor

50. Su'aal: Dad badan ayaa marka ay haweenaydu umusho ayna tukan oo soomin xataa hadday daahir tahay, waa maxay xukunkeedu?

Jawaab: Nifaasku sida xaydka oo kale ayuu dumarka u diidayaa salaada, soonka iyo galmeda(jimaaca). Nifaasku waa dhiig dumarka ka yimaada umusha awgeed, maadaama ay haweenaydu dhiigaa isku arkayso inta ay afartanka ku dhex jirto ma tukaynayso, mana soomayso, ninkeedana xalaal uma aha inuu u galmoodo ilaa intay ay daahir noqonayso ama ay afartan baxayso. Hadii uu dhiigu ka socdo illaa ay afartan baxayso(afartan baxa ka dib) waxa waajib ku ah inay maydhato (qubaysato) markay afartan baxdo, waayo mudada nifaasku kama badato afartan maalmood sida saxa ah. Kolkaa waa inay maydhato, oo tukato, ninkeedana waa u xalaal. Waa inay dhiiga iskaga ilaalso cudbi iyo wixii lamida si aanu ugu

dhicin dharkeeda iyo jidhkeeda. Xukun ahaan dhiigani wuxuu la mid yahay dhiiga istixaadada oo uma diidayo salaada iyo soonka, umana diidayo ninkeeda, waxana ku waajiba inay u waysaysato salaad walba, haddiise ay daahir noqoto afartan baxa ka hor waa inay maydhato, tukato, oo soonto, ninkeedana waa u xalaal maadaama ay daahir noqotay, xataa haba ahaato dhowr cisho umusheeda ka dibe. Haddiise dhiigu ku soo noqdo afartan baxa ka hor waa inay joojiso salaada iyo soonka, ninkeedana xalaal uma aha ilaa ay daahir noqonayso ama ay afartan baxayso. Salaadaha ay tukatay iyo soonka ay soontay maalmahay daahirka ahaydna waa sax oo waajib kuma aha inay qalayso.

Sh.Ibnu Baaz

51. Su'aal: Haweeney ka daahirtay nifaaskii intaanay afartan bixin ka hor ayaa maydhatay oo soontay maalmihii ka hadhsanaa Ramadaan. Kolkaasaa lagu yidhi waxa kugu waajiba inaad qalayso maalmihii aad soontay afartan baxa ka hor, waa maxay xukunka sharciga ee arinka ku saabsani? Ma qale ayaa ku waajiba mise kuma waajiba? Galmoodku ma u banaan yahay hadii ay daahir noqoto afartan baxa ka hor? Haddii ay xaydka daahir ka noqoto inta ayna dhammaan todoba cisho galmoodku xalaal ma u yahay mise uma aha?

Jawaab: Haddii arinku yahay sidaad sheegtay, ooy daahir noqotay afartan baxa ka hor, ka dibna ay maydhatay oo ay soontay, soonka ay soontay maalmaha ka horeeyay afartan baxeedu waa sax oo laguma laha qale, sidoo kale waxba kuma jabna galmoodka dhacay maalmahaa dheddooda, waxaan u jeedaa ka dib markay daahirka noqotay ee ay maydhatay afartan baxa ka hor. Sidoo kale waxba kuma jabna in loo galmoodo haweenayda xaydka ka daahir noqota todoba cisho ka hor.

Sh.Ibnu Baaz

Xukunka Soonka Haweenay Ka Daahirowday Nifaaska oo Haddana Dhiigii Ku Soo Noqday Afartan Baxa Hortii

52. Su'aal: Hadii haweenayda nifaaska lihi daahirowda wiig gudihii oo ay muslimiinta la soonto maalmo ka mida Ramadaan, oo haddana dhiigu ku soo noqdo, xaalandan oo kale miyay afuraysaa? Ma inay qallaysaana maalmihii ay soontay iyo kuwii ay afurtay?

Jawaab: Haddii haweenayda nifaaska lihi daahirowdo afartan baxa ka hor, ooy soonto maalmo, oo haddana dhiigii ku soo noqdo iyadoon afartan bixin, soonkeedu waa sax waxana ku waajiba inay salaada iyo soonka joojiso maalmaha dhiigu ku soo noqday, waayo dhiigaasi waa nifaas ilaa ay daahir noqoto ama ay afartan baxdo. Markay afartan baxdana waxa ku waajiba maydhasho xataa haddii aanu wali dhiigii ka istaagin, waayo mudada nifaasku waxay ku dhammaataa afartan cisho, sida culimada badankoogu (*al-Jumhuur*) qabaan. Afartan baxa ka dib haddii dhiigu ka istaagi waayo waxa ku waajiba inay salaad walba u waysaysato waqtigeeda ilaa uu dhiigu ka istaagayo siduu Nabigu (صلى الله عليه وسلم) ku amray haweenay mustaxaado ah. Ninkeedana waxa u xalaala inuu ku raaxaysto iyada wixii ka dambeeya afartan baxa xataa haddii aanu dhiigu ka istaagin, waayo dhiiga xaalkiisu sidaa la sheegay yahay waa dhiig cudur (دم فساد) oon qofka dumarka ah u diidayn salaada iyo soonka. Sidoo kale uma diidayo ninka inuu ku raaxaysto xaaskiisa.

Haseyeeshee, haddii dhiiga ka socda afartan baxa ka dib uu waafaqo waqtigii caadadeeda xaydka, kolkaasi waa inay joojiso salaada iyo soonkaba , una ictibaarto inuu yahay xayd. Allaah ayaana bixiya towfiiqda.

Sh.Ibnu Baaz

53. Su'aal: Haddii ay qofka nifaaska lihi daahirowdu afartan baxa ka hor ma soomi karta mana tukan kartaa mise uma banaana? Haddii xaydku ku soo noqdo miyay afuraysaa? Haddii ay mar labaad daahir noqoto ma soomaysaa oo ma tukanaysaa mise uma banaana?

Jawaab: Haddii nufasadu daahir noqoto afartan baxa ka hor waxa ku waajiba maydhasho, salaada iyo soonka bisha Ramadaan, ninkeedana waa u xalaal. Haddii dhiigo ku soo laabto afartan baxa ka hor waxa ku waajiba in ay joojiso salaada iyo soonka, ninkeedana xaaraan ayey ka tahay (inuu u galmoodo) sida ugu saxsan hadalada culimada. Xukunkeeduna waa inay nifaas leedahay ilaa ay daahir noqonayso ama ay afartan baxayso. Haddii ay daahirowdo afartan baxa hortii ama afartan baxa waa inay maydhato oo soonto, ninkeedana xalaal waa u tahay. Haddii dhiigu istaagi waayo afartan baxa ka dib, dhiigaasi waa mid cudur, isaga awgiina joojin mayso salaada iyo soonka, ninkeedana waa u xalaal sida mustaxaadada. Waxana ku waajiba inay istinjooto ooy isku ilaalso wixii ka khafiifinaya soodaadashada dhiiga sida cudbiga iyo wixii la mida, waana inay salaad walba u waysaysato waqtigeeda siduu Nabigu amray haweenay mustaxaado ah. Laakiin haddii ay ka timaado caadada bishu, waxaan u jeedaa xaydkee, waa inay salaada joojiso.

Sh.Ibnu Baaz

Xukunka Soonka Mustaxaadada

54. Su'aal: Haweenayda mustaxaadadi miyay u banaantahay ninkeeda?

Jawaab: Mustaxaadadu waa haweenayda uu ka socdo dhiig aan aheyn xayd iyo nifaas midna. Xukunkeeduna waa xukunka dumarka daahirka ah oo kale, oo waa inay soonto, tukato, ninkeedana waa u xalaal. Waa inay u waysaysato salaad walba sida dadka xadaska joogtada ah leh, ee kaadida, dhuusada iwm ay sida joogtada ah uga socdaan. Waxana ku waajiba inay iska ilaalso dhiiga ooy xidhato cudbi iyo wixii la mida, si aanu u nijaasayn jidhkeeda iyo dharkeeda, sidaasayna sheegeen axaadiista ka sugaran Nabigii.

Sh.Ibnu Baaz

Xukunka Soonka Xaa'idada iyo Nufasada

55. Su'aal: Waa maxay xukunka soonka haweenayda xaydka leh iyo ta nifaaska leh? Haddii ay dib u dhigaan qallaha ilaa Ramadaanka dambe maxaa ku waajiba?

Jawaab: Xaa'idada iyo nufasada waxa ku waajiba inay afuraan waqtiga ay xaydka iyo nifaaska leeyihiiin, soonka iyo salaaduna uma banaana waqtiga ay xaydka iyo nifaaska leeyihiiin, oo salaada iyo soonku kama ansaxayaan labadooda midna. Waxa ku waajiba in ay soonkii dhaafay qalleeyaan, salaadase qalleen maayaan, sidaa waxa sheegaya xadiiska Caa'isha ka sugaran, oo markii la waydiiyay: miyey xaa'idadu qalleenaysaa soonka iyo salaada? Waxay tidhi:

((كنا نؤمر بقضاء الصوم ولا نؤمر بقضاء الصلاة)) متفق على صحته.

((Waxa nala amri jiray-waqtigii Nabiga- inaanu soonka qalleeno, salaadda in aanu qalleenu nalama amri jirin)).

Culimadu , Alle u ha naxriistee, waxay isku waafaqeen oo ijmaaca, in arinka ay Caa'ishi sheegtay oo ah in xaa'idada iyo nufasada ay waajib ku tahay inay qalleeyaan soonka ooyna qalleen salaada, taasina waa naxariis Alle siiyay iyo inuu u fudaydiyay. Waayo salaada maalin walba shan jeer ayaa la tukadaa, inay qalleeyaanaa dhib ayaa ka soo gaadhaysa. Soonku isagu mar kaliya ayuu sanadkii waajib yahay, waana soonka Ramadaan oo qallahiisa wax dhibaato ahi ka soo gaadhi mayso iyaga. Tii iyadoo cudurdaar sharchiya lahayn qallaha dib u dhigta ilaa Ramadaanka dambe laga gaadhayo waxa ku waajiba inay Alle uga toobad keento arinkaasi, inay qallayso maalmihii dhaafay iyo inay maalin walba ooy qallaheeda dib u dhigtay ka bixiso kafaaro gud ah inay quudiso miskiin.

Waxa sidoo kale ah qofka buka iyo musaafirka, oo haddii ay iyaguna qallaha dib u dhigaan ilaa ramadaanka dambe soo galayso iyagoon lahayn cudurdaar sharchiya, waxa iyagana ku waajiba qalle, towbad iyo inay maalin walba ka bixiyaan kafaaro gud ah muskiin la quudiyo. Haddiise xanuunka ka bogsanwaayo ama safar wali ku jiro ilaa Ramadaanka dambe soo galayso ,waxa ku waajiba inay qalleeyaan oo kaliya, fidyana laguma laha markuu xanuunka ka bogsado iyo markuu safarka ka soo laabto.

Sh.Ibnu Baaz

Gabadh ka Daahirowday Xaydka Dharaar Ramadaan Dhexdeed

56. Su'aal: Waa maxay xukunka ku saabsan gabadh xaydkii ka daahirowday dharaar Ramadaan dhexdeeda?

Jawaab: Sida ugu saxsan hadalada culimada, waxa ku waajiba inay ka fogaato waxa soonka jabiya inta maalinta ka hadhay, waayo wuu dhamaaday cudurdaarkeedii sharciga ahaa, waxa kale oo ku waajiba inay qallayso maalintaa. Xukunkeeduna wuxuu la mid yahay sida haddii inay Ramadaan tahay la ogoodo dharaarta dhexdeeda, xaalandu markay noocan tahayna waxa dadka Muslinka ah ku waajiba inay maalinta inta ka hadhay ka fogaadaan waxyaalaha soonka jabiya iyo inay qalleeyaan maalintaasi sida culimada intooda badin qabaan (*al-jumhuur*). Waxa kale oo xukunkeeda la mida haddii musaafirku ku soo laabto baladkiisii dharaar Ramadaan dhexdeeda, waxa isagana ku waajiba inuu inta maalinta ka hadhay ka fogaado waxyaalaha soonka jabiya, sidaasaana waafaqsan sida ugu saxsan hadalada culimada, waayo xukunkii safarku kuma dabaqmayo maadaama uu safarkiisii dhamaaday. Waxase ku waajiba inuu maalintaa qalleeyo. Alle ayaa towfiiqda bixiya.

Sh.Ibnu Baaz

Hooyada Ilmaha Nuujinaysa iyo Soonka

57. Su'aal: Ma u banaantahay hooyada ilamha nuujinaysa inay soonka iska dhaafto? Goormayse qallaynaysaa? Miyayse masaakiin quudinaysaa (fidyo bixinaysaa)?

Jawaab: Hooyada ilmaha nuujinaysaa haddii ay soonka uga baqato ilmaheega (cunugeeda), oo haddii ay soonto caanuhu yaraanayaan, ilmihiina u sidaa ku dhibaatoonayo waxa u banaan inay soonka iska dayso, haseyeeshee waa inay soonkii ka tagay qallayso, maxaa yeelay waxay la mid tahay qofka buka ee xaalkiisa Allaah ka yidhi:

{وَمَنْ كَانَ مَرِيضًا أَوْ عَلَى سَفَرٍ فَعِدَّةُ مِنْ أَيَّامٍ أُخَرَ يُرِيدُ اللَّهُ بِكُمُ الْيُسْرَ وَلَا يُرِيدُ بِكُمُ الْعُسْرَ} البقرة:185

{Qofkii buka ama safar ah waxa saaran tiro maamlmo kale, wuxuu Allaah idinla doonayaa fudayd ee idinlama doonayo culays}.

Hadaba hadii uu cudurdaarkii (wixii ay ka cabsanaysay) dhamaado waa inay qallayso xiliga Jiilaalka ee maalintuna gaabantahay hawaduna qabowdahay, haddii ayna qalleen waqtiga jiilaalka waa inay qallayso sanadka dambe. Quudintu (fidyadu) waxay banaantahay marka cudurdaarku (waxa qofka soonka u diidayaa) yahay wax joogto ah oon laga rajo qabin inuu dhamaado, waa xaaladdaasi ta layska rabo in fidyo la bixiyo (miskiin la quudiyo) halkii laga soomi lahaa (soonka badelkiisa).

Sh.Ibnu Cusaymiin

Xukunka Hooyada Ilamaha Nuujinaysa iyo Xaamilada

58. Su'aal: Ma u banaantahay inay afuraan hooyada ilamaha nuujinaysa iyo xaamiladu (gabadha uurka leh)? Ma qalle ayaa ku waajiba mise waxa ku waajiba inay kafaaro-gud ka bixiyaan maalmihii ay afureen? Alle khayr haydinka siiyo.

Jawaab: Bismillahi, Ilaahay ayaana xamdi leh, hooyada ilamaha nuujinaysa iyo xaamilada labadoodaba xukunkoodu wuxuu la mid yahay xukunka qofka

buka, oo haddii soonku dhib ku yahay waxa u banaan inay afuraan, qallena waa ku waajib markay kari karaan sida qofka buka. Culimada qaarkood ayaa qabta in waxa kaliya ee ku waajibi yahay inay maalin walba oo dhaaftay ka bixiyaan kafaaro-gud, oo ah in miskiin la quudiyo. Ra'yiganise waa daciif waana laga xoog badan yahay, sida saxa ahina waa in labadoodaba qalle ku waajib yahay sida musaafirka iyo qofka buka, taasina waxa daliil u ah hadalka Alle *caza wajalla*:

{ وَمَنْ كَانَ مَرِيضًا أَوْ عَلَى سَفَرٍ فَعِدَّةُ مِنْ أَيَّامٍ أُخْرَ } البقرة:185

[Qofkii buka ama safar ah, waxa saaran tiro maalmo kale]

Waxa kale oo xukunkan u daliila xadiiska Anas bin Maalik Al-Kacbi: Rasuulkii Alle (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) ayaa yidhi:

((إِنَّ اللَّهَ وَضَعَ عَنِ الْمَسَافِرِ الصَّوْمَ وَشَطَرَ الصَّلَاةَ وَعَنِ الْحَبْلِ وَالْمَرْضِ عَنِ الصَّوْمِ)) رواه الخمسة.

((*Ilaahay musaafirka waxa uu ka dhaafay soonka iyo salaada badhkeed, xaamilada iyo hooyada naaska nuujinaysana wuxuu ka dhaafay soonka*)) waxa soo wariyay shant.

Sh.Ibnu Baaz

Xukunka Xaamilada Soonku Dhib ku Yahay

59. Su'aal: Haweenay uur leh oo soonka awoodi u lahayni maxay sameeynaysaa?

Jawaab: Xukunka gabadha uurka leh ee soonku dhib ku yahay waxa uu la mid yahay xukunka qofka buka, waxa kale oo la mida gabadha ilmaha nuujinaysa, oo haddii soonku dhib ku yahay labadoodaba waxa u banaan inay afuraan, laakiin qalle ayaa ku waajiba, hadalka Alle *subxaanuhu* awgii:

{وَمَنْ كَانَ مَرِيضًا أَوْ عَلَى سَفَرٍ فَعِدَّةُ مِنْ أَيَّامٍ أُخَرَ } البقرة:185

{Qofkii buka ama Safar ah, waxa saaran tiro maalmo kale}.

Saxaabada Nabiga kuwo ka mida ayaa la sheegay inay qabeen in xaamilada iyo hooyada ilmaha nuujinaysa labadaba lagu leeyahy quudin kaliya. Waxase sax ah sida aan hore u sheegnay oo ah in xukunkoodu la mid yahay xukunka qofka buka, waayo waxa sugar in qalle waajib ku yahay, mana jiro daliil xukunkaasi lid ku ahi.

Waxa kale oo daliil u ah xadiiska Anas bin Maalik Al-Kacbi inuu Nabigu (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) yidhi:

((إِنَّ اللَّهَ وَضَعَ عَنِ الْمَسَافِرِ الصَّوْمَ وَشَطَرَ الصَّلَاةَ وَعَنِ الْحَبْلِ وَالْمَرْضِ الصَّوْمَ)) رَوَاهُ أَحْمَدُ وَأَهْلُ السَّنَنِ . الأربعة بإسناد حسن.

((*Ilaahay musaafirka waxa uu ka dhaafay soonka iyo salaada badhkeed, xaamilada iyo hooyada naaska nuujinaysana wuxuu ka dhaafay soonka*). Axmed iyo afarta ehl sunanka ayaa ku soo weriyay isnaad xasana.

Waxa ay taasi tusaysaa inay musaafirka kala mid yihiin dhinaca xukunka soonka , ooy afurayaan, qallena lagu leeyahay. Haseyeeshee, gaabinta salaada, oo ah in salaadaha afarta rakcadooda laga dhigo laba rakcadood waa xukun ku khaasa musaafirka oo cid kale lama wadaagto, Ilaahey ayaa towfiiqda bixiya.

Sh.Ibnu Baaz

Qof Xanuunsanaya oo Soonku Dhib Ku Yahay

60. Su'aal: Wuxuu ahay haweenay xanuunsanayasa, waxana iga tagey oonan soomin maalmo ka mida bishii Ramdaan ee sanadkii hore, inaan qalleeyana ma awoodin xanuun aawadii ee waa maxay kafaaro gudka laygu leeyahay? Sidoo kale ma awoodo inaan soomo Ramadaanka sanadkan ee waa maxay kafaaradu?

Jawaab: Qofka xanuunsanaya ee soonku ku dhib yahay waxa u banaan inuu afuro, waqtiga Ilaahey siiyo caafimaadna waa inuu qalleeyo soonka ka tagey hadalka Alle subxaanuhuu awgii:

{وَمَنْ كَانَ مَرِيضًا أَوْ عَلَى سَفَرٍ فَعِدَّهُ مِنْ أَيَّامٍ أُخْرَ} البقرة: 185

{Qofkii buka ama Safar ah, waxa saaran tiro maalmo kale}.

Qoftan su'aasha na weydiisayna wax dambiyi kaama soo gaadhayo afurka (soon la'aanta) aad bishan afurtay haddii wali xanuunkii ku hayo. Waayo in aan la soomini waa rukhsad Alle siiyay qofka xanuunsanaya iyo musaafirka, Allena subxaanuhuu wuxuu jecel yahay in rukhsadiisa la qaato siduu u neceb yahay in Isaga la caasiyo. Wax kafaaro-gud ahna kugu waajib maaha, laakiin markuu Ilaahey ku siiyo caafimaad waa inaad qallayso. Ilaahey ha kaa shaafiyo wax walba oon wanaagsanayn, Anaga iyo adigana ha dhaafo danbiyadeena.

Sh.Ibnu Baaz

Xukunka Maydhista Kalyaha (Kidney Dialysis)

61. Su'aal: Qof kalyuhu xanuunayaan ayaa waxa uu u baahanyahay in waqtiyada qaarkood kalyaha loo maydho (dhaqo), arinkaasi oo lagu magacaabo maydhista kalyaha, waa maxay xukunkiisu hadduu qofku soomanyahay? Noo faa'iideeya Alle haydin barakeeyee?

Jawaab: Bismi Allaah wal xamdulilaah, waxa qofkan ku waajiba qalle, waayo dhiig hufan ayaa la siinayaa, haddii dhiiga lagu daro waxyaabe kalena iyana waa wax kale oo soonka jabinaya.

Sh. Sh.Ibnu Baaz

Qofka Bilowga Ramadaan Ogaaday Waabariga ka Bacdi

62. Su'aal: Waxa fadiilatul sheekh la waydiiyay xukunka qofka bilowga bisha Ramadaan ogaaday waabariga ka bacdi, muxuu qofkani yeelayaa?

Jawaab: Qofka aan ogaan bilowga bisha Ramadaan illaa waabariga ka bacdi, waxa ku waajiba inuu ka joogsado waxyaabaha soonka jabiya inta maalinta ka hadhay, waayo waa maalin Ramadaan ooyna u banaanayn qof aan musaafir ahayn inuu ku dhaco waxyaabaha soonka jabiya, waxa kale oo ku waajiba inuu maalintaa qalleeyo, waayo soonka muusan niyoon waabariga ka hor, waxaana Nabiga (صلی اللہ علیہ وسلم) ka sugan inuu yidhi:

((من لم يبيت الصيام قبل طلوع الفجر فلا صيام له))

((Qofka aan soonka niyaysan waabariga ka hor, soon uma jiro)).

Al-Muwafaq ibnu Qudaama Allaah ha u naxariistee, ayaa ku sheegay al-Muqni sidaasi, waana qowlka fuqahado badankooga. Soonkana waxa loola jeedaa soonka waajibka ah sida xadiiska shariifka ah ku xusun, soonka sunnahah ah (soonka aan waajibka ahayn) waxa banaan in niyaddiisa la unko maalinta dhexdeeda haddii aanu qofku ku dhicin (intaa ka hor) waxyaabaha soonka jabiya, waayo waxa Nabiga (صلی اللہ علیہ وسلم) ka sugmay xadiis sidaasi tilmaamaya.

Waxaanu Allaah waydiisanaynaa inuu Muslimiinta waafajiyo wixii Isaga raali galinaya, kana aqbalo soonkooda iyo qiyaamkooga isagaa ah wax maqle dhow.

وصلی اللہ علی نبینا محمد وآلہ وصحبہ وسلم.

Sh.Ibnu Baaz

Qof Sooman oo Wax Cunay Isagoo Ilowsan

63. Su'aal: Waa maxay xukunka qofka isagoo ilowsan wax cunay ama cabay? Ma ku wajibaa qofka arka qof isagoo Ilowsan wax cunaya ama cabaya inuu xusuusiysooonkiisa?

Jawaab: Qofka sooman ee isagoo ilowsan wax cuna ama caba , soonkiisu waa sax, hadduuse xusuusto waa inuu joojiyo, xataa haddii cuno am cabitaan afka ugu jiro waxa ku waajiba inuu soo tufo. Inuu soonkiisu sax yahayna waxa u daliila hadalka Nabiga (صلی الله علیہ وسلم) ee ku sugaran xadiiska Abii Hurayra:

((من نسي وهو صائم فأكل أو شرب فليتم صومه فإنما أطعنه الله وسقاه))

((Qofkii sooman ee isagoo ilowsan wax cuna ama caba, soonkiisa ha dhamaysto waayo Allaah ayaa quudiyay oo waraabiyay isaga)).

Qofkana looma qabto hadduu isagoo ilowsan sameeyo wax aan u banaanayn, Allaah ayaa yidhi:

{ربنا لا تؤاخذنا إن نسينا أو أخطأنا} فقال الله تعالى قد فعلت.

{Rabigayow hanoo qaban haddaanu hilmaamno ama gafno} (Ilaahay tacalaa waxa uu yidhi : waan sameeyey).

Qofkiise arka waxa ku waajiba inuu xusuusiysooonkiisa, waayo waa munkar bedelid(doorin,reebid) Nabiguna (صلی الله علیہ وسلم) wuxuu yidhi:

((من رأى منكم منكراً فليغیره بيده فإن لم يستطع فلسانه فإن لم يستطع فقلبه)).

((Qofkii munkar arkaa ha ku bedelo gacantiisa, hadduu Kari waayo, carabkiisa, hadduu Kari waayana qalbiga ha ka inkiro)).

Waxaan shaki ku jirin qofka sooman oo wax cuna ama cabaa ay tahay munkar, laakiin waa laga cafiyyay hadii uu sameeyo isagoo ilowsan, qofkiise arka isagu cudurdaar uma laha inuu xusuusin waayo (ka aamuso).

Sh. Ibnu Cusaymiin

Qof Sooman oo Matagay

64. Su'aal: Miyuu matagu soonka jabiya?

Jawaab: Haddii uu qofku iska matajiyo soonkiisu wuu jabayaa, haddiise uu matagu ka yimaado isagoon u qasdiyin soonkiisu ma jabayo, waxana u daliila xadiiska abii Hurayra ee ah inuu Nabigu (صلى الله عليه وسلم) yidhi:

(من ذرعه القى فلا قضاء عليه، ومن إستقاء عمدًا فليقض))

((Qofkii matagu ka xoog bato qale laguma laha, qofkiise iska matajiyaa waa inuu qaleeyo)).

Hadii uu matagu ku soo jiidho(dhaafo) soonkaagu ma jabayo. Haddii uu qofku dareemo in caloosha la walaaqayo oo u maleeyo in matag ka imanayo, maxaynu qofkaa ku odhanaynaa: haysku dayin inaad joojiso, iyo inaad soo saartid midna, meel dhexdhedaada is taag, oo hayskana matajin hayskana joojin, waayo haddii aad iska matajisid waad afurtay (soonkaagii wuu jabay), haddii aad joojisidna naftaada ayaad wax yeelaysaa, ee iska dhaaf, haddii uu soo baxo adigoon iska keenin waxba kuma yeelayo soonkaaguna kuma jabayo.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Qof Sooman oo Gororay

65. Su'aal: Gororku soonka ma jabiyaan

Jawaab: Gororku soonka ma jabiyo xataa haddii uu badan yahay, waayo wuu ka baxsan yahay ikhtiyaarka qofka.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Dharaar Ramadaan Dhexdeed oo Xaaska la Dhunkado

66. Su'aalo: Haddii ninku dhunkado xaaskiisa ama taataabto dharaar Ramadaan dhexdeed miyuu soonkiisu jabayaan mise ma jabayo? Noo faa'iideeyaa Alle ha idiin faa'iideeyee.

Jawaab: Ninku isagoo sooman hadduu xaaskiisa dhunkado, u mubaasharoodo, oo mudaacabeeyo (laab-isasaarid iyo taataabasho) isagoon u galmoon, waxba kuma jabna oo intaasiba waa u banaantahay. Waayo Nabiga (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) ayaa isagoo sooman xaaskiisa dhunkan jiray oo mubaasharayn jiray. Haseyeeshee haddii shahwadiisa oo xoog leh awgeed uu ka cabsanayo inuu ku dhaco waxa Alle ka xarimay (Gal mood), kolkaasi waa loo karaahiyeystay inuu dhunkado ama mubaashareeyo xaaskiisa isagoo sooman. Haddii dhunkashada ama mubaasharada awgeed ay mani ka timaado soonkiisii wuuu jabay, waxana ku waajiba inuu inta maalinta ka hadhay ka fogaado waxyaabaha soonka jabiya iyo inuu maalintaaa qalleeyo sida ay qabaan jamhuurka culimadu.

Madidu iyadu ma jabiso soonka sida waafaqsan hadalada culimada ka ugu saxsan, waayo waxa asala inuu soonku sax yahay wax jabiyaan aanu jirin, waxa kale oo raga ku adag inay iska ilaaliyaan madida. Alle ayaana towfiiqda bixiya.

Sh. Ibnu Baaz

Xukunka Nin u Galmooday Xaaskiisa Dharaar Ramadaan

67. Su'aal: Qof ayaa u galmooday xaaskiisa maalin Ramadaan, kolkaasaa lagu yidhi waxa kugu waajiba inaad quudiso lixdan miskiin. Hadaba quudinta masaakiintu ma inay Makka gudaheeda noqotaa mise maaha? Xaaskiisana ma kafaaro gud ayaa iyadana ku waajiba?

Jawaab: Haa, labadoodaba waxa ku waajiba kafaaro gud hadii uu u galmooday dharaar ramadaan. Kafaaro gudkuna waa: qoor mu'minada xoraynteed, haddii ay awoodi waayaan waxa ku waajiba mid walb inuu soomo laba bilood oo israacsan, waa haddii ay iyaduna raali ka ahayd galmoodka, haddii ay awoodi waayaan waxa ku waajiba in mid walba quudiyo lixdan miskiin, oo ah in midkoodba bixiyo soddon saac, marka laysku darana waa lixdan saac oo loo qaybiyo lixdan miskiin. Miskiin waliba waxa ku soo hagaagaya saac, saac badhkii oo ninku bixiyay iyo badhka kale oo xaaskiisu bixisay. Sidaasina waxay yeelayaan haddii ay awoodi waayaan xoraynta iyo soonka. Waxa kale oo labadoodaba ku waajiba inay qalleeyaan maalintii ay isku galmoodeen iyo inay Allaah u toobad keenaan, inay Isaga u soo laabtaan, danbigoodii ka murugoodaan, kana fogAADAN samayntiisa iyo inay dambi dhaaf Alle waydiistaan. Waayo in dharaar Ramadaan laysku galmoodaa waa munkar wayn, oon banaanayn tiiyoo la soomanyahay.

Sh.Ibnu Baaz

68. Su'aal: Nin iyadoo Ramadaana u galmooday xaaskiisa waabariga ka hor, oon joojin galmoodkii ilaa waabariga ka dib, maxaa ku waajiba isaga iyo xaaskiisa? Allah khyar haydinka siiyo.

Jawaab: Waxa labadoodaba ku waajiba inay toobad keenaan iyo kafaar gud. Taasi oo ah qoor xoraynteed, haddii ay awoodi waayaan waa inay soomaan laba bilood oo israacsan, haddii ay awoodi waayaan waa inay quudiyaan lixdan miskiin, miskiin walba waa in la siiyo saac badhkii oo ah cunada laga cuno meesha ay ku noolyhiin.

Xukunka Nin Xaaskiisa Galmood Ku Qasbay Dharaar Ramadaan

69. Su'aal: Ka: Cabdul Caziiz bin Cabdullah bin Baaz, Ku: Walaalka sharafta leh A.M Alle ha waafajiyo aamiin. Salaamu Calaykum waraxmatullaahi wabarakaatu, ka dib:

Way I soo gaadhad warqadaadii aad soo dirtay 24/4/1395 H, Alle haydinku xidhiidhiyo hanuunkiisa, waxaad sheegtay inaad u galmoontay xaaskaaga dharaar Ramadaan iyo inay iyadu ku diiday ood ku qasbtay, waxaad kaloo sheegtay inaad ka shakisantahay inaad xaaskaaga u galmoontay maalin kaliya ama laba maalmood, iyo inaadan awoodin inaad qoor xorayso iyo inaad soonto midna iyo waxyaabha kale eed sheegtay iyo inaad fatwa rabto.

Jawaab: Haddii uu arinku yahay sidaad sheegtay, kafaaro gud ka bixi maalintaad galmoodka ku dhacday, oo ah inaad quudiso lixdan miskiin, miskiin walbana aad siiso saac badhkii oo ah cunada baladkaaga laga cuno (قوت البلد), haddii aad qadaysiiso ama cashaysiisana way kaa kaafiyaysaa. Galmoodka maalinta aad ka shakisantahayna waxba kaagama waajib aha, waayo waxa asala inaad bari ka tahay, haddii aad kafaaro gud ka bixisana adigoo is badbaadinaya ama taxadiraya (على سبيل الاحتياط) taasina waxba kuma jabna. Xaaskaaga iyada wax kafaaro ahi kuma waajiba, waayo waad qasbtay. Wuxuu kugu waajiba inaad Alle subxaahnahu uga toobad keento camalkan xun, waxa kale oo kugu waajiba inaad gallayso maalintaa aad galmoodka samaysay.

Waxaanu Alle waydiisanaynaa inuu anaga, adiga iyo muslimiinta oo idil na cafiyo, Isagaa ugu khayr badan cid wax la waydiisto. Wasalaamo Calaykum Waraxmatullaahi Wabarakku.

Madaxa Jaamacadda Islaamiga ee Al-Madiina.

Sh.Ibnu Baaz

Qof Mani Iska keenay Isagoo Sooman

70. Su'aal: Haddii qof soomani uu mani iska keeno miyuu soonkiisii jabaya? Miyayse waajib ku tahay kafaaro-gud?

Jawaab: Haddii qofka soomani uu mani iska keeno ooy manidii ka soo daadato soonkiisii wuu jabay, waxana ku waajiba inuu qalleeyo maalintaa uu manida iska keenay, hasayeesh ee kafaaro-gud kuma waajib aha, waayo kafaaradu waxa kaliya eey ka waajibtaa waa gal moodka, laakiin waxa qofkan ku waajiba inuu ka toobad keeno waxaa uu sameeyay.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Qofka Sooman oo Cunto Dhadhamiyay

71. Su'aal: Soonku miyuu jabaya haddii cuntada la dhadhamiyo?

Jawaab: Soonku kuma jabo cuntada oo la dhadhamiyo, haddii aan la liqin, hasayeesh ee dhadhamin haddii ayna baahi kugu kalifin, haddiise ay baahi kugu kalifto soonkaagu ma jabayo xitaa haddii waxaad dhadhamisay wax ka midi ku siibaataan (galaan) calooshaada adigoon u qasdiyin (u kasin).

Sh. Ibnu Cusaymiin

Shaqooyinka Adag Iyo Soonka

72. Su'aal: Waa maxay ra'yiga fadiiladiinu aad ka qabtaan qofka shaqadiisu adag tahay ee soonkuna ku adag yahay, ma u banaan tahay inuu afuro (aanu soomin)?

Jawaab: Sidaan u arko masaladani waxa weeyi inayna banaanayn in loo afuro (la soomi waayo) shaqada darteed, haddii ayna suurta gal ahayn in la soomo tiiyoo la shaqaynayo, waa inuu fasax qaato bisha Ramadaan si ay ugu suurta gasho inuu soomo Ramadan, waayo soonka Ramadaan waa rukni ka mida arkaanta Islaamka oohna banaanayn in laga tagaa.

Sh.Ibnu Cusaymiin

Hadal Xaaraana oo Lagu Hadlay Dharaar Ramadaan Miyuu Jabinayaa Soonka

73. Su'aal: Hadduu qofku ku hadlo hadal xaaraana maalinta Ramadaan miyuu soonkiisii fasaadayaa?

Jawaab: Haddii aynu akhrino hadalka Ilahay *caza wa jalla*:

{ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا كُتِبَ عَلَيْكُمُ الصِّيَامُ كَمَا كُتِبَ عَلَى الَّذِينَ مِن قَبْلِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ }

[Kuwa xaqa rumeeyow soonbaa laydinku waajibiyay sidii loogu waa jibiyay kuwii idinka horeeyay si aad taqwo u heshaan]

Waxaynu ogaanay xikmada ku jirta soonka oo ah taqwada iyo in Ilahay la caabudo (سبحانه وتعالى) waa in laga tago muxaramaadka, marka si guud loo sheegana (عند الإطلاق) waxay koobaysaa in la falo wixii lays amray lagana tago wuxii layska reebay, Nabiguna (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) wuxuu ydihi:

(من لم يدع قول الزور والعمل به والجهل فليس الله حاجة في أن يدع طعامه وشرابه)

((Qofkii aan iska deyn hadalka beenta ah iyo ku camalfalkiisa, Alle uma baahna inuu qofkaasi iska daayo cuntadiisa iyo cabiddiisa)).

Sidaasi awgeed waxa qofka sooman ku mu'akad ah inuu ka fogaado hadalada iyo ficiilada xaaraanta ah. Waa inaanu dadka xaman, been sheegin, namiimo u kala qaadin dadka, ka ganacsan xaaraan, oo ka fogaado xaaraanta oo dhan. Haddii qofku ku camal falo amarada, kana tago muxaramaadka bil dhan, naftiisu way toosnaan sanadka intiisa kale.

Waxase murug leh in dad badan oo soomaa ayna kala saarin maalinta ay sooman yihiin iyo maalinta ay afuran yihiin, waxay iskaga dhaqmaan wixii u caado ah ee

hadalada xaaraanta ah sida beenta, qishka iyo iwm, kamana dareemaysid haybadda soonka. Ficiladaasina ma burinayaan soonka, haseyeeshee waxay nuqsaaminayaan ajarkiisa, haddii lays barbar dhigana waxaba laga yabaa in uu dayacmo ajarkii soonku.

Sh.Ibnu Cusaymiin

Waa Maxay Shahaadatul Suur

74. Su'aal: Waa maxay shahaadatul suur? Miyayse soonka jabisaa?

Jawaab: Shahaadatul suur waxay ka mid tahay dambiyada kuwa ugu waaweyn, waxana weeyi inuu qofku ka markhaati kaco waxaanu ogayn, ama wax ka duwan wuxuu ogyahay, soonka ma burinayso laakiin ajarkiisa ayay nuqsaaminaysaa.

Ibnu Cusaymiin

Qof Bukaanoo Afuray oo Dhintay Ramadaan Dhexdeeda

75. Su'aal: Qof bukaana oo afuray Ramadaan, oo afar cisho ka dib markay bisho bilaabmantay dhintay, qofkaasi miyuu qallaynayaa?

Jawaab: Haddii xanuunkan ku dhacay yahay xanuunada kadada ah (xanuunada laga rajo qabo in laga bogsado) lagama qallaynayo haddii xanuunku hayo oonu ka bogsan ilaa u dhintay, waayo Ilaahey, *koreeye* ayaa yidhi:

{وَمَنْ كَانَ مَرِيضًا أَوْ عَلَى سَفَرٍ فَعِدَّهُ مِنْ أَيَّامِ أُخْرَ} الْبَقْرَةُ: 185

{Qofkii buka ama Safar ah, waxa saaran tiro maalmo kale}.

Markaa waxa ku waajiba qofkan buka inuu soomo tiro maalmo kale ah(haddii uu ka bogsado xanuunka), haddiise uu dhinto ka hor inta aanu awoodin qallaha, kolkaasi qalle laguma laha waayo wuxuu dhintay isagoon gaadhin waqtigii

soonku ku waajibka ahaa, wuxuuna la mid yahay qof dhintay bisha Shacbaan oo kuma waajiba inuu soomo Ramadaanta soo socota.

Haddiise xanuunku ka mid yahay xanuunada aan laga rajo qabin in laga bogsado, markaasi waxa sideedaba qofkan ku waajiba inuu maalin walba quudiyo miskiin.

Sh.Ibnu Cusaymiin

Qofka Dhinta Ramadaan Dhexdeeda Laguma laha Soon

76. Su'aal: Aabahay ayaa dhintay Ramadaan seddexdeedii, ma igu waajibaa inaan ka soomo inta bisha ka hadhay oo ah seddex iyo labaatan cisho?

Jawaab: Waxba kuma saarna, waayo markuu aabahaa dhintay ayuu waajibkii ka dhacay, kuma saarna (lagaa dooni maayo) inaad aabahaa ka soonto, kuumana banaana.

Sh.Ibnu Baaz

Qaraabada Waxa u Banaan Inay ka Soomaan Maydkooda

77. Su'aal: Samaaxat Sheekh CabdulCaziis bin Cabdullaahi bin Baaz xafidahu Allaah Asalaamu Calaykum wa raxmatullaahi wa barakaatuhu, intaa ka dib: waxaan rajaynayaa in layga jawaabo su'aashan:

Haweenay uu hayo cudur nafsaaniyi ayaa waqtiyada qaarkood xanuusata oo dhakhtarka la dhigaa, waqtiyada ay caafimaadana way ka soo baxdaa, markaasay dhimatay iyadoo lagu leeyahay soon laba bilood oo Ramadaan, waa Maxay xukunkeedu?

Jawaab: Wacalaykuma Assalaam wa raxmatullaahi wa barakaatuhu, ammaa bacdu:

Waxa banaan in kuwo ka mida qaraabadeedu ay iyada ka soomaan hadalka Nabiga (صلی الله علیه وسلم) awgii:

((من مات وعليه صيام صام عنه وليه)) متفق على صحته.

Waliga waxaa looga jeedaa waa qofka qaraabada laga yahay dhinaca aabaha ama dhinaca hooyada midkood, haddii aya suurto gali weydo in la helo qof ka soomana waxa laga quudinaya maalin walba miskiin la siinayo saac badhkii, saacuna wuxuu la mid yahay kiiloo iyo badh. Dhibaatana kuma jirto in dhamaan la wada siiyo miskiin kaliya ama reer baahan(faqiira).

Ilaahay dhamaan ha waafajiyo wixii Isaga raali galinaaya.

Wasaalamu Calaykum wa raxmatullaahi wa barakaatuhuu.

Muftiga Guud ee Boqortooyada Sucuudi Careebiya
CabduCaziis bin Cabdullaahi bin Baaz.

Waajib Maaha in Qallaha laysku Xidhiidhiyo

78. Su'aal: Haddii Muslinku isagoo cudurdaar leh afuro laba maalmood oo isku xiga bisha Ramadaan, siduu u qallaynayaa?

Jawaab: Qalle ayaa ku waajiba xataa hadduu qaleeyo isagoon isku xigsiinayn (israacinayn), oo israacintu waajib maaha (لا يجب عليه التتابع) waayo Ilaahay,*subxaanahuu wa tacaalaa*, wuxuu yidhi:

{وَمَنْ كَانَ مَرِيضًا أَوْ عَلَى سَفَرٍ فَعِدَّهُ مِنْ أَيَّامِ أُخْرَ} البقرة:185

{Qofkii buka ama Safar ah, waxa saaran tiro maalmo kale}.

Ilaahay ma odhan (متتابعة) maalmo is israacsan (xidhiidhsan). Haddii qofku afuro laba maalmood ama seddex ama in ka badan waxa ku waajiba qalle, oo inuu isku xigsiyo qallaha waajib kuma aha, hadduuse isku xigsiyo ayaa fadli badan, hadduuna isku xigsiina dhib ma laha.

Sh.Ibnu Baaz

Koox Saxaabada Nabiga (صلی اللہ علیہ وسلم) Ka Mida Ayaa Ku Fityooday In Qofkii Qallaha Dib U Dhiga Lagu leeyahay Qalle iyo Kafaaro (Quudin)

79. Su'aal: Waa maxay xukunka qofkii ka taga qallaha soonka Ramadaan ilaa ay soo gasho Ramadaantii kale isagoon lahayn cudurdaar, miyay ku filan tahay towbada iyo qalluhu, mise waxa waajib ku ah kafaaro?

Jawaab: Waxa ku waajiba inuu u toobad keeno Ilaahey, *subxaanahuu*, iyo inuu maalin walba oo dhaaftay quudiyo miskiin isla markaana uu qaleeyo (soonkii dhaafay), quudintuna waa saac badhkii oo ah saacii Nabiga (صلی اللہ علیہ وسلم), oo ah cunada laga cuno baledkaaga (قوت البلد) oo timira ama bura ama bariis iwm, wuxuuna leegyahay (la mid yahay) kiilo iyo badh ugu dhawaantii (taqriiban). Kafaaro intaa aan ahayna kuma waajiba, sida ay fityoodeen koox ka mida saxaabodu (رضي الله عنهم) kuwaasi oo Ibnu Cabaas (رضي الله عنهم) ka mid yahay. Haddiise uu lahaa cudurdaar sida xanuun ama safar, ama ay tahay haweenay leh cudurdaar ah uur (xaamilo tahay) am ay ilmo nuujinayso oo soonkuna ku adag yahay kuwaasi waxa ku waajiba qalle oo kaliya.

Sh.Ibnu Baaz

Soonka Qofka Da'da Ah

80.Su'aal: Maxay samaynaysaa haweenay da' weyn oon kareen soonku?

Jawaab:Waxa saaran inay maalin walba miskiin quudiso saac badhkii oo ah cunada baladkeeda sida timirta, bariiska iwm. Saac badhkiina wuxuu u dhigmaa kiiloo iyo badh ugu dhawaan (taqriiban). Sidaana waxa ku fityooday koox ka mida Saxaabadii Nabigu (صلی اللہ علیہ وسلم) oo Ibnu Cabaas ka mid yahay, Ilaahey ha kawada raali noqdo. Haddii ay faqiir tahay ooyna kareen quudinta waxba

laguma laha. Waxana banaan in kafaaradan la siiyo miskiin kaliya, ama loo kala qaybiyo dhowr miskiin, waxa kale oo banaan in la bixyo bisha bilowgeeda ama dhexdeeda amaba dhamaadkeeda, Ilaahey ayaa bixiya towfiiqda.

Sh.Ibnu Baaz

81. Su'aal: Maxaad ka qabtaan dadka loo rukhseeyay afurka sida oday iyo islaan weyn, iyo qof buka oon laga rajo qabin inuu bogsado, fidyo miyaa kaga waajiba afurkooda?

Jawaab: Qofkii kari waaya soonka weyni (da') awgeed ama xanuun aan laga rajo qabin in laga bogsado awgii waxa ku waajiba inuu maalin walba oo uu afuray quudiyo miskiin haddii uu karo (مع القدرة ، sidaana waxa ku fityooday koox saxaabada ka mida (رضي الله عنهم) oo uu ka mid yahay Ibnu Cabaas Ilaahey haka raali noqdee.

Sh.Ibnu Baaz

Qof Qaba Xanuunka Macaanka iyo Alsarka

82. Su'aal: Wuxaan qabaa xaunuunka macaanka iyo alsarka ee haddii aan soomi kari waayo maxaa igu waajiba inaan sameeyo?

Jawaab: Haddii ay dhakhtarada cuduradan ku takhasusay go'aamiyaan in cudurka uu soonku dhibayo mar walba, aqoontooduna tustay in xanuunkan aan laga rajo qaban in laga bosado, markaasi iska afur oo quudi miskiin maalin walba oonad soomin, waxaad siinaysaa miskiinka saac badhkii oo ah cunada baladkaaga laga cuno, saacuna wuxuu u digmaa kiilo iyo badh ugu dhawaan, Ilaahey ayaa xamdi leh. Soona kuguma waajiba hadalka Ilaahey, *subxaanahuu*, awgii:

{فَاتَّقُوا اللَّهَ مَا أَسْتَطَعْتُمْ} التغابن: 16

{Allaah ka cabsada intaad kartaan}.

Sh.Ibnu Baaz

Qofka Miyir Beelaya Muxuu Ka Yeelayaa Soonka

83. Su'aal: Abuu Qaasim oo reer Riyaada, ayaa leh: Nin miyir beelaya dhowr saacadood miyuu soonku waajib ku yahay?

Jawaab: Haddii uu miyir beelayo dhowr saacadood waxa waajiba soon, wuxuu la mid yahay qofka hurda (seexda) waqtiga qaarkii. Hadduu miyir beelayo waqtiyo ka mida dharaarta ama habeekuna uma diidayso(manciyayso) inuu soonku ku waajib yahay. Ilaahay ayaanu weydiinaynaa shifo iyo caafiyad.

Sh.Ibnu Baaz

Toobinta Iyo Soonka

84. Su'aal: Haddii qofku sooman yahay oo dhiig ka soo daato, miyuu soonkii ka jabayaan mise wuu sii wadan karaa soonkiisa?

Jawaab: Dhiiga kaliya ee soonka wax yeelaaa waa dhiiga ku soo daata toobinta, hadduu qofku is toobana soonkii wuu ka jabayaan sida saxa ah, culimaduna way isku khilaafeen arinkan laakiin waxa saxa in toobintu jabiso soonka hadalka Nabiga (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) awgii:

(أفطر الحاجم والمجموع)

((Wuu afuray ka wax toobay iyo ka la toobayba)).

Laakiin hadduu gororo ama nabar kaga dhaco lugta ama gacanta isagoo sooman kolkaa soonkiisu waa sax oo wax ma yeelayo(yacnii dhiiga ka soodaata gororka ama nabarku).

Sh.Bin Baaz

85. Su'aal:Waa maxay xaaladaha uu soonku ku jabayo dhiiga soo daata:

Jawaab: Soonku kuma jabo waxaan ahayn toobinta sida saxa ah, waxana arinkan ka jira Khilaafka xooga leh(الخلاف القوي) , culimada badankooduna waxay arkaan in aanu soonku ku jabayn xataa toobinta, waxase raajixa inuu ku jabayo toobinta.

Sh.Ibnu Baaz

Fiiro: Khilaafka xooga leh(الخلاف القوي) ee Sheekhu (رحمه اللہ) tilmaamay ee la xidhiidha in toobintu soonka jabinayso iyo in kale waa mid jira, culimada qabta in toobintu aanay jabinayn soonkana waxa weeyi jumhuurka culimada (culimada badankooda) waxana ka mida seddexda imaam ee Abuu Xaniifa, Maalik iyo Shaafici, halka uu imaam Axmed isagu ka qabo inay toobintu soonka jabinyaso. Jumhuurku waxay daliishadeen xadiiska imaam Bukhaari ka soo weriyay Ibnu Cabaas : (رضي الله عنهم) :

روى البخاري عن ابن عباس رضي الله عنهم ((أن النبي صلى الله عليه وسلم احتجم وهو محرم، واحتجم وهو صائم)).

((*Nabigu wuxuu istoobay isagoo muxrima, wuxuuna istoobay isagoo sooman*))

Waxay kaga jawaabeen xadiiska tiirka u ah culimada tidhi toobintu way jabinaysaa soonka ee ah xadiiska uu soo weriyay Shaddaad bin aws (صلى الله عليه وسلم) oo ah inuu Nabigu (رضي الله عنه) yidhi:

((أَفْطَرَ الْحَاجُّ وَالْمَحْجُومُ))

((*Wuu afuray ka wax toobay iyo ka la toobayba*)).

Inay yidhaahdeen waxa lagu nasakhay xadiiska Ibnu Cabaas, Al-Xaafid ibnu Xajar (رحمه الله) ayaa ku yidhi buuggiisa (فتح الباري) isagoo tacliqinaya xadiisaka ((احتجم وهو محرم، واحتجم وهو صائم)) (*Nabigu wuxuu istoobay isagoo muxrima, wuxuuna istoobay isagoo sooman*)) sidan soo socota:

(قال ابن عبد البر وغيره: فيه دليل على أن حديث **(أَفْطَرَ الْحَاجُّ وَالْمَحْجُومُ)**، منسوخ لأنه جاء في بعض طرقه أن ذلك كان في حجة الوداع، وبسبق إلى ذلك الشافعى).

(Ibnu Cabdul Bar iyo kuwo kale ayaa yidhi daliil ayaa ku jira ah in xadiiska ((*wuu afuray ka wax toobay iyo ka la toobayba*)) uu yahay xadiis la nasakhay. Waayo duruqdiisa lagu soo weriyay kuwo ka mida ayaa sheegay inuu arinkaasi ahaa waqtigii xajatul wadaaca, imaam Shaafici ayaa uga horeeyay (oo sheegay inuu mansuukh yahay).

Waxay culimadu sheegeen in xadiiska Shaddaad (رضي الله عنه) uu Nabigu (صلى الله عليه وسلم) yidhi waqtigii fatxul Maka, xadiiska Ibnu Cabaasna (رضي الله عنهم) yidhi waqtigii xajtul wadaaca, taasina ay xoojinayso in xadiiska Ibnu Cabaas nasakhay xadiiska Shaddaad.

Imaam Shaafici ayaa qaba in karaahi ku jirta in qofka soomani istoobo, isagoo arka in aanu soonku jabayn, wuxuu (رحمه الله) yidhi:

(لو ترك رجل الحجامة صائماً للتوقي كان أحب إلى ولو احتجم لم أره يفطره)

(Inuu ninku iska dhaafo inuu istoobo isagoo sooman si uu isku ilaaliyo ayaan jecelahay, hadduuse istoobana uma arko inuu soonkiisu jabayo).

Imaam Maalik (رحمه الله) ayaa sheegay in Cabdullaahi bin Cumar istoobi jiray isagoo sooman Ramadaan iyo waqtiyo kaleba, haddana wuu iska dhaafay isagoo diidan in toobinta daciifiso.

Faa'iido: Dhiiga layska shubo si loogu baadho shaybaadhka, isagu waa wax yar oon jidhka daciifinayn, lamana mid aha toobinta, sidaa awgeed Sh.Ibnu Baaz iyo Sh. Ibnu Cusaymiin (رحمهما الله) waxay ku fityoodeen in aanu soonka jabinayn haddii layska shuba.

Dhiiga layska shubo si loogu deeqo qof buka oo u baahan, dhiigaasi wuu badan yahay, culimada koox ka mida ayaa raacisay xukunka toobinta oo tidhi wuu jabinaya soonka, culimada sidan qabta waxa ka mida Sh.Ibnu Cusaymiin.

Culimada qaadatay ra'yiga Jumhuurka ee ah in soonku aanu ku jabin toobinta, iyagu ma arkaan in dhiiga noocani jabinayo soonka.

Tarjumaha (عف الله عنه).

Aadaabta Soonka

86. Su'aal: Waa maxay aadaabta soonku?

Jawaab: Adaabta soonka waxa ka mida in la laazimo taqwada (cabsida) Allaah caza wa jalla, iyadoo taa lagu xaqiijinayo in amaradiisa lagu camal falo, wixii uu reebayna laga fogaaado, Allaah waxa uu yidhi:

{ يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا كُتِبَ عَلَيْكُمُ الصَّيَامُ كَمَا كُتِبَ عَلَى الَّذِينَ مِنْ قَبْلِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَتَّقَوْنَ } .

[Kuwa xaqa rumeeyow soonbaa laydinku waajibiyay sidii loogu wajibiyay kuwii idinka horeeyay si aad taqwo u heshaan (Alle uga cabsataan)]

Nabiguna (صلى الله عليه وسلم) wuxuu yidhi:

(من لم يدع قول الزور والعمل به والجهل فليس الله حاجة في أن يدع طعامه وشرابه)

((Qofkii aan iska deyn hadalka beenta ah iyo ku camalfalkiisa, Alle uma baahna inuu qofkaasi iska daayo cuntadiisa iyo cabiddiisa)).

Waxa kale oo ka mida aadaabta soonka in la badsado sadaqada, samafalka iyo in dadka iksaan loo sameeyo, khaasatan Ramadaan, waayo Nabigu isagaa dadka ugu deeqsisanaa, Isagana waxay deeqsanidiisu ugu badnayd Ramadaan markuu Jibriil la kulmayo ee uu Qur'aanka la darsayo.

Waxa kale oo ka mida in laga fogaado wuxuu Allaah xarimay ee ah beenta, cayda, qishka, khayaanada, eegitaanka xaaraanta ah, dhagaysiga waxa xaaraanta ah iyo wixii kuwaa la mida ee ah muxaramaadka ay ku waajibka tahay qofka sooman iyo cid walba oo kale inay ka fogaadaan, laakiin qofka sooman mu'akad ayey ku tahay ka fogaanta arimahaasi.

Waxa kale oo ka mida aadaabta soonka, in la suxuurto iyo in suxurta dib loo dhigo siduu Nabigu (صلى الله عليه وسلم) yidhi:

((تسحروا فإن في السحور بركة))

((Suxuurta, waayo suxurta waxa ku jira barako)).

Waxa kale oo ka mida aadaabta soonka in lagu afuro timir qoyan haddii la waayana timir qalalan (engegan), haddii uu iyana waayo ha ku afuro biyo. Waxa kale oo ka mida aadaabta soonka in lagu dhakhsado afurka marka la hubsado inay cadceedii dhacday ama aad loogu maleeyo inay dhacday siduu Nabigu (صلى الله عليه وسلم) yidhi:

((لا يزال الناس بخير ما عجلو الفطر))

((*Dadku khayr ayay ku sugnaan doonaan intay afurka dedejinayaan*)).

Sh. Ibnu Cusaymiin

Qur'aanka Akhriska Mise Salaada Sunaha Ayaa Fadli Badan

87.Su'aal: Maalmaha bisha Ramadaan ee barakaysan ma in Qur'aanka la akhristaa fadli badan mise in la tukado salaada sunaha?

Jawaab: Siduu Nabigu ﷺ u camal fali jiray bisha Ramadaan waxa ka mida inuu badsan jiray noocyada kala duwan ee cibaadada, Jibriil ayaa Qur'aank la mudaarasayn jiray habeenkii, markuu Jibriil la kulmana dabeesha wuu uga dheerayn jiray khayrka. Isagaa dadka ugu deeqsisanaa, wuxuuna ugu deeqli badnaa bisha Ramadaan, wuuna badsan jiray sadaqada, samafalka, Qur'aan akhriska, salaada, xuska Alle iyo ictikaafka. Sidaasi ayuu ahaa camalka Rasuulku bisha Ramadaan dhexdeeda.

Kala fadilida akhrinta Qur'aanka iyo salaada sunuhu waa arin ku xidhan xaaladaha dadka ee kala duwan, qiimayteeda Allaah ayaa *jalla wacalaa* u cilmi leh, waayo Isagaa wax walba koobay.

Sh.Ibnu Baaz

Qof Qalle lagu Leeyahay oo Doonaya Inuu Soomo Lixda Shawaal

88. Su'aal: Sidee ayaa ugu fadli badan in loo soomo lixda Shawaal?

Jawaab: Sida ugu fadliga badani waa in soonka lixda maalmood ee Shawaal lagu xigsiiyo Ramadaan iyo in laysku xidhiidhiyo oon la kala goynin sida ehl u cilmigu sheegeen, waayo sidaasi ayaa aad ugu dhow ku camalfalka israacinta xadiiska lagu sheegay (ثم أتبعه) (dabeetana raaciya), sidoo kale sidaasi waxay ka mid tahay u degdega khayrka ay aayadaha iyo axaadiistu inagu dhiiriyeen laguna ammaanay qofkii ku camal fala, waxay kaloo sidani waafaqsantahay go'aan adayga (xilkasnimada) oo ka mida caqli badnida qofka, maxaa yeelay ma banaana in la dayaco fursadaha, qofkuna kama warhayo waxa uu kala kulmi

doono mustaqbalka. Wuxuu u jeedaa u degdega iyo ka faa'iidaysiga fursadaha, oo loo baahan yahay in adoonku sidaa ka yeelo arimihiisa oo dhan marka saxnimadoodu cadaato.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Fiiro: Hadalka sheekha ee ah "Sida ugu fadliga badani waa in soonka lixda maalmood ee Shawaal waa in lagu xigsiiyo Ramadaan" yaana laga fahmin in ay banaantahay in la soomi karo maalinta ciidda. Soomintaanka maalinta ciiddu waa xaaraan, mana banana, ujeedada sheekhuna waa in soonka lixda Shawaal la bilaabo maalinta ciidda ku xigta. Tarjumaha.

89. Su'aal: Ma u banaantahay qof inuu isagu doorto maalmaha uu ka soomayo bisha Shawaal, mise maalmahani waxay leeyihii waqtii go'an? Haddiise uu qofka Muslinka ahi soomo maalmahaas, ma waajib ayay ku noqonaysaa oo waa waajib inuu sanad walba soomo?

Jawaab: Wuxuu yidhi: (صلى الله عليه وسلم) inuu yidhi:

((من صام رمضان ثم أتبعه ستاً من شوال كان كصيام الدهر))

((Qofkii sooma Ramadaan dabeetana raaciya lix cishoo bisha Shawaali, wuxuu la mid yahay sidii qof soomay sanadkoo dhan)).

Lixadan maalmood ma laha waqtii go'an oo la xadiday, balse qofka mu'minka ahi wuxuu bisha ka soomi karaa maalmuhuu doono, haddii uu doono wuxuu soomi bisha bilowgeeda, haddii uu doono wuxuu soomi bisha dhexdeeda, haddii uu doono wuxuu soomi bisha aakhirkeeda, haddii uu doonana wuu kala fariqi karaa, Allaah mahaddii arrinka cidhiidhi kama yeelin. Haddii uu bisha horaanteeda soomo isagoo iswada raacinayana sidaasaaba ugu fadli badan, waayo waa in khayarka loo degdego, laakiin Allaah mahaddii arrinka cidhiidhi kuma jiro waana waasic. Haddii uu doono waa israacinayaa haddii uu doonana waa kala fariqi karaa. Haddii xataa uu sanadaha qaarkood soomo, qaarna ka tako iyana dhib malaha, waayo waajib maaha.

Sh. Ibnu Cusaymiin

Israacintu Shardi uma Aha Soonka Shawaalka

90. Su'aal: Ma waajibaa in soonka lixda shawaalk laysku xidhiidhiyo, mise wax dhibi kuma jirto in bisha dhexdeeda lagu ..?

Jawaab: Soonka lixda Shawaal waa sune ka sugar Rasuulka Ilaahey (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) Waxana banaan in lays raaciyo iyo aan laysraacin (متتابعةً ومتفقةً) waayo Rasuulku (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) ma sheegin israacin iyo israacin la'aan midna, sida uu yidhi:

((من صام رمضان ثم أتبعه ستاً من شوال كان كصيام الدهر)) أخرجه الإمام مسلم في صحيحه.

((Qofkii sooma Ramadaan dabeetana raaciya lix cishoo bisha Shawaali, wuxuu la mid yahay sidii qof soomay sanadkoo dhan)).

Ilaahay ayaa towfiiqda bixiya.

Sh.Ibnu Baaz

Xukunka Soonka Maalinta Caashuura

91. Su'aal: Waa maxay xukunka soonka maalinta Caashuuraa?

Jawaab: Markuu Nabigu (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) soo gaadhay Madiina ayaa wuxuu arkay inay Yahuudu soomaan maalinta tobnaad ee bisha Muxaram, kolkaasuu Nabigii (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) yidhi:

((أنا أحق بموسى منكم فصامه وأمر بصيامه))

((Anigaa Nebi Muuse idiinka xaq leh, wuuna soomay dadkana amray inay soomaan)).

Xadiiska Ibnu cabaas ee Bukhaari iyo Muslin isku waafafeen ayaa sheegay inuu Nabigu (صلى الله عليه وسلم) soomay maalinta Caashuura ,dadkana faray inay soomaan. Waxa Nabiga la waydiiyay fadliga soonka maalinta caashuura Kolakaasuu yidhi:

((احتسب على الله ان يكفر السنة التي قبله))

Hasayeeshee si Yahuuda loo khilafo ayuu kadib dadka amray in soonka maalinta tobnaad lala soomo maalinta ka horaysa ee ah sagaalka ama maalinta ka dambaysa ee ah kow iyo tobanka. Sidaa awgeedna sida ugu fadliga badani waa in la soomo maalinta tobnaad laguna daro maalinta ka horaysa ama maalinta ka dambaysa. Maalinta sagaalaad oo lala soomo ayaana ka fadli badan in lala soomo maalinta kow iyo tobnaad.

Kolkaa waxa kula gudboon walaalkayga muslinka ahow inaad soonto maalinta Caashuura iyo maalinta Sagaalaad.

Sh. Ibnu Cusaymiin

92. Su'aal: Al-akh Cabdul Quduus Muxamed oo ku nool magaalada Riyaad ayaa waxa uu warsanaya xukunka soonka maalinta Caashuura, iyo sida ugu fadliga badan ee loo soomi karo siday tahay, ma in maalinta ka horaysa lala soomayaa mise maalinta ka dambaysa, mise intaba waa la soomayaa, mise maalinta Caashuura too kaliya ayaa la soomayaa. Wawaanu idinka rajaynaynaa inaad arinka noo caddaysaan Allaah khayr haydinka siiye.

Jawaab: Soonka maalinta Caashuuraa waa sunne, waxaana sidaa u daliila axaadiis saxiixa oo Rasuulka Allaah (صلى الله عليه وسلم) ka sugaran. Yahuuduna way

soomi jireen maalintaa, waayo Maalintaa ayuu Allaah badbaadiyyay Nabi Muuse iyo qoomkiisii, halaagayna Fircoo iyo qoomkiisii. Kolkaasuu Nabigeena Muxammadna (صلى الله عليه وسلم) u soomay inuu Allaah u shukriyo, dadkana wuxuu amray inay soomaan, wuxuuna inoo jideeyay in lala sooma maalinta ka horraysa ama maalinta ka dambaysa, waxase fadli badan in lala soomo maalinta sagaalaad, haddii la soomo maalinta tobnaad iyo maalinta kow iyo tobnaadna way kaaga filantahay khilaafida Yahuuda. Haddii la soomo dhammaan sagaalka, tobonka iyo kow iyo tobankana wax dhibi kuma jirto, waayo axaadiista qaarkood ayay ku timid:

((صوموا يوماً قبله ويوماً بعده))

(*Sooma maalinta ka horraysa iyo maalinta ka dambaysa*)

Hasayeeshee in kaligeed la soomo waa la karaahiyaystay, Allaah ayaana towfiiqda bixiya.

Sh.Ibnu Baaz

93. Su'aal: Muslimiin badan ayaa soonta maalinta Caashuura, aadna way ugu dadaalaan soonkeeda, tiiyoo ay sababtu tahay dhiirigalinta iyo tarqiibka soonkeeda ku saabsan ee ay ka maqlaan ducaada. Maxaa hadaba dadka loogu dhiiri galinwaayay inay raad raacaan bilowga bisha Muxaram, si ay Muslimiintu u ogaadaan dhalashada bisha ka dib marka idaacada laga sheego ama lagu baahiyio ilaha warbaahinta?

Jawaab: Soonka maalinta Caashuuraa waa sunne la jecelyahay in la soomo, Nabiga iyo asxaabtiisa ayaa soomay, iyaga ka hor Nabi Muuse ayaa soomay si Allaah caza wajalla loogu shukriyo, waayo waa maalin la badbaadiyyay Muuse iyo qoomkiisii, lana halaagay Fircoo iyo qoomkiisii, kolkaasay Muuse iyo Reer banii Israa'iil u soomeen inay Allaah caza wa jal u shukri naqaan. Nabigeenuna wuu soomay si uu Allaah caz wajal ugu shukri naqo iyo inuu ku daydo Nibigii Alle ee Muuse. Ehlu Jaahiligii ayaa iyaguna soomi jiray, Nabiguna ummada

ayuu faray inay soomaan, markii Allaah farad yeelay soonka Ramadaan ayuu Nabigu (صلی اللہ علیہ وسلم) yidhi:

((من شاء صامه ومن شاء تركه))

(Qofkii rabaa ha soomo kii rabaana hayska daayo).

Waxa uu Nabigu (صلی اللہ علیہ وسلم) sheegay in soonkeeda Allah ku dhaafayo ooy kafaaro u tahay danbiyadii sanadkii tegey. Wuxuu fadli badan in lala soomo maalinta ka horaysa ama maalinta ka dambaysa si Yahuuda loo khilafo, Nabigaana yidhi:

((صوموا يوماً قبله أو يوماً بعده)) وفي لفظ ((صوموا يوماً قبله ويوماً بعده))

(Sooma maalinta ka horaysa ama maalinta ka dambaysa) xadiis kale waxa ku yimid: (sooma maalinta ka horaysa iyo maalinta ka dambaysa.)

Haddii qofku soomo maalinta ka horaysa ama maalinta ka dambaysa maalinta Caashuura, amaba uu soomo maalinta ka horaysa iyo maalinta ka dambaysa sidaasina way wanaagsantahay. Taana waxa ku jirta in la khilafo cadowga Alle ee Yahuuda. In aad layskugu taxalujiiyo garashada habeenka Caashuuraa maaha laazim, waayo soonkeedu waa sunne ee maaha waajib. Kolkaasi maaha in layskugu yeedho garashada bisha, waayo haddii qofka mu'minka ahi gafo oo soomo maalinta ka dambaysa iyo maalinta ka horaysa taasi dhibimayso, wuxuuna helayaa ajar badan. Sidaa awgeed waajib maaha in aad layskugu taxalujiiyo garashada bilowga bisha arinkaa awgii, waayo waajib maaha ee waa sunne.

Sh.Ibnu Baaz

Xukunka Ictikaafka

94. Su'aal: Waa maxay xukunka ictikaafku? Bixitaanku ma u banaanyahay qofka muctakifka ah si uu xaajadiisa (musqusha) u guto, cunto iyo dawo

raadsado? Waa maxay sunanka ictikaafku, Waa maxayse ictikaafka saxa ah ee ka sugaran Nabiga (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ)؟

Jawaab: Ictikaafku waa in masaajidka lagu negaado si loogu banbaxo daacada Ilahaay (عزوجل), waana sune si loo raadasado laylatul qadriga, Ilahaayna (تعالى) wuu ku sheegay Qur'aanka sida ku xusan hadalkiisa (تعالى) :

{وَلَا تُبَاشِرُوهُنَّ وَأَنْتُمْ عَاكِفُونَ فِي الْمَسَاجِدِ} البقرة: 187

{Hana u tagina (ha u galmoonina) haweenka idinkoo ku ictikaafaya masaajidda}.

Saxiixaynka (Bukhaari iyo Muslin) iyo kuwo kaleba waxa ku sugaran Nabiga (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) ictikaafay, saxaabadiisuna la ictikaافتay, ictikaafkuna wuxuu ahay arin banaan oon la nasakhin (xukunkiisa la bedelin).saxiixaynka waxa ku sugaran sida Caa'sha (رضي الله عنها) ay tidhi: (*Nabigu (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) wuxuu ictikaafi jiray tobanka ugu dambeeyaa Ramadaan ilaa uu dhintay, isaga ka dibna waxa ictikaafay xaasaskiisii*).

Saxiix Muslim waxa kaga sugaran Abuu Saciid Al-Khudriyi (رضي الله عنه) in Nabigu (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) ictikaafay tobanka ugu horeeya Ramadaan dabeetana uu ictikaafay tobanka dhexe, dabeetana uu yidhi: ((*Waxaan ictikaafay tobanka hore anigoo raadinaya habeenkani (yacnii laylatul qadriga), dabeetana waxaan ictikaafay tobanka dhexe, dabeetana waa la ii yimid oo laygu yidhi: waxay ku jirtaa tobanka dambe. Hadaba qofkii jecel inuu ictikaafaa ha ictikaaf*)) Markaasay dadkii la ictikaafeen.

Imaam Axmed (رحمه الله) ayaa yidhi:

"لَا أَعْلَمُ عَنْ أَحَدٍ مِّنَ الْعُلَمَاءِ خَلَافًا أَنَّ الْإِعْتِكَافَ مَسْنُونٌ"

"Ma garanayo qof ka mida culimada oo khilaaf ka keenay inuu ictikaafku sune yahay".

Sidaa awgeed inuu ictikaafku banaan yahay waxa sugaya naska (Qur'aanka iyo xadiiska) iyo ijmaaca.

Meesha uu ku ansaxayaa waa masaajidda lagu oogo salaada jamaacada beledkay ku taalaba caamnimada hadalka Ilahay awgii:

وَأَنْتُمْ عَاكِفُونَ فِي الْمَسَاجِدِ { البَقْرَةُ: 187 }

{ Idinkoo ku ictikaafaya masaajidda }.

Waxana fadli badan in lagu ictikaafu masaajidda lagu oogo salaada jimcaha si aanu ugu baahan inuu u baxo inuu soo tukado, hadduuse ku ictikaafu masaajid aan lagu tukan salaada jimcaha , wax dhibi kuma jirto inuu u baxo salaada jimcaha.

Waxa u haboon muctakifka inuu ku mashquulo daacada Ilahay, *caza wajal*, sida salaada, akhriska Qur'aanka, digriga Ilahay, *caza wajal*, waayo kaasi weeyi ujeedada ictikaafku, wax dhibina kuma jirto inuu wax yar la sheekaysto saaxiibadii, khaasatan haddii ay faa'iido ku jirto.

Muctakifka waxa ka xariman gal moodka (jimaaca) iyo wixii hordhac u ah.

Bixitaanka uu muctakifku ka baxayo masaajidka waxay culimadu u qaybiyeen seddex qaybood:

Kow: Mid banaan, waan inuu u baxo arin lagama maarmaana oo sharciga iyo abuurkaba waafaqsan, sida u bixida salaada jimcaha, cunada iyo cabitaanka haddii ayna jirin cid u keenaysaa, waxa kale oo ka mida u bixida waysada iyo maydhashada waajibka ah, iyo xaajo gudashada (musqusha).

Laba: U bixida daacada (camal cibaado ah) oon isga ku waajib ahayn sida booqashada qof buka iyo ka qaybgalka janaasada. Haddiise uu shardi ka sii dhigtay bilowgii ictikaafkiisa kolkaa way u banaan tahay (siyaarada qof buka iyo raacida janaasadu) haddii kale uma banaana (inuu baxo).

Seddex: U bixidda arin ka soo horjeeda ictikaafka sida tagista guriga, ganacsiga, jimaaca xaaska iwm, arimahaasi ma banaana shardi iyo shardi la'aanba. Ilahay ayaa towfiqda bixiya.

Sh.Ibnu Cusaymiin



أَسْأَلُ اللَّهَ الْعَظِيمَ رَبَّ الْعَرْشِ الْعَظِيمَ أَنْ يُعِينَنَا عَلَى ذِكْرِهِ وَشُكْرِهِ وَحْسَنِ عِبَادَتِهِ، وَأَنْ يَصْلَحْ قُلُوبَنَا
وَيَشْرَحْ صُدُورَنَا بِالإِيمَانِ، وَأَنْ يَخْتِمْ لَنَا شَهْرَ رَمَضَانَ بِالغُفْرَانِ، وَالْعُنْقَ مِنَ النَّيْرَانِ، وَالْفُوزَ بِالْفَرْدَوْسِ
مَعَ الْحَبِيبِ الْمُصْطَفَى صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ، وَأَنْ يَعِيدَهُ عَلَيْنَا وَعَلَى الْأَمَّةِ الإِسْلَامِيَّةِ بِالْخَيْرِ وَالْيَمِينِ
وَالْبَرَّكَاتِ، كَمَا نَسْأَلُهُ تَعَالَى أَنْ يَرْزُقَنَا بِفَضْلِهِ وَمِنْهُ وَكَرْمِهِ وَجُودِهِ عِلْمًا نَافِعًا وَعَمَلاً صَالِحًا، وَصَلَّى
اللَّهُ عَلَى نَبِيِّنَا مُحَمَّدًا وَآلِهِ وَصَحْبِهِ وَسَلَّمَ .

المصادر والمراجع:

1. فتاوى أركان الإسلام، الشيخ محمد بن صالح العثيمين، جمع وترتيب فهد بن ناصر بن إبراهيم السليمان. الطبعة الأولى، دار الثريا للنشر والتوزيع، الرياض، 1424هـ.
2. مجموع فتاوى ومقالات متعددة، الشيخ عبدالعزيز بن عبدالله بن عبدالرحمن بن باز، جمع وترتيب وإشراف د. محمد بن سعد الشوبير. الطبعة الثالثة، دار العاصمة، الرياض، 1423هـ.
3. موسوعة الأحكام الشرعية، لأصحاب الفضيلة العلماء ابن باز، ابن العثيمين، ابن جبرين، الفوزان وغيرهم، جمعها ونسقها وخرج أحديثها واعتنى بها محمد بن رياض الأحمد. المكتبة العصرية، بيروت، 1426هـ.